# XAQIIJINTA KA QAYBGALKA SIYAASADDA:
## XUQUUQDA AADANAHA EE HANAANKA DOORASHOOYINKA SOOMAALIYA

Agoosto 2018



UNITED NATIONS HUMAN RIGHTS
OFFICE OF THE HIGH COMMISSIONER

UNSOM

## Jadwalka Tusmada


LIISKA EREYADA LA SOO GAABIYAY ..... 3

Warbixinta oo Kooban ..... 4

I. Habka Cilmi Baarista ..... 8

II. Xaaladda guud ..... 10

Xaaladda Guud ee Xuquuqda Aadanaha. ..... 10

Hannaanka Doorashooyinka ee 2016 ka ..... 12

III. Hanaanka Sharci ..... 16

IV. Xadgudubyada Xuquuqul Insaanka ee Xaaladda Hanaanka Doorashooyinka ..... 19

Xaqa Nolosha iyo badqabka Jirka ..... 20

Xaqa Xorriyadda iyo Amniga ..... 23

Xaqa Xorriyadda Fikradda (ra'yiga) iyo Hadalka ..... 23

Xuquuqda Xoriyadda isku Imaanshaha Nabadda ah iyo Urur Sameynta ..... 26

Xuqa Ka Qeybgalka Arrimaha Danta Guud ..... 28

Jawaab-celinta Garsoorka ee Xadgudubka iyo ku Xad-gudubka Xuquuqda Aadanaha ee Doorashada la xidhiidha ..... 30

Baarista Arrimaha Xuquuqda Aadanaha ee Diiwaanka Ugu Jira Musharaxiinta Doorashooyinka ..... 31

Helidda Garnaqa/Xaalka Xadgudubyada Doorashooyinka ..... 32

V. Doorashada Madaxwaynaha Somaliland ee 13kii Nofembar 2017 ..... 35

Xaqa Ka-qaybgalka Arimaha Danta Guud ..... 37

Xuquuqda Nolosha iyo badqabka Jidhka ..... 37

Xuquuqda Xorriyadda ka-mid-noqoshada , Fikradda, Hadalka, iyo Saxaafadda ..... 38

VI. Gunaanad ..... 41

VII. Talooyinka ..... 44

Ku Dowladda Federaalka Soomaaliya ..... 46

Ku Somaliland ..... 47

Ku Beesha Caalamka ..... 48

**LIISKA EREYADA LA SOO GAABIYAY**

MGB: Maamulka Gobolka Banaadir

FIEIT: Kooxda Federaalka ee Hirgalinta Doorashooyinka Dadban

FGS: Dowladda Federaalka Soomaaliya

FMS: Dawladaha xubnaha ka ah Federaalka

HRPG: Kooxda Ilaalinta Xuquuqda Aadanaha

IED: walxaha qarxa

IEDRM: Guddiga Madaxa Banaan ee Xalinta Khilaafaadka Doorashada

IESG: Kooxda iskudhafka ah ee Taageerida Doorashooyinka

ISWA: Maamulka Ku-meelgaarka ah ee Koonfur Galbeed

JISA: Hay'adda Sirdoonka iyo Amniga ee Jubaland

NCF: Golaha Wadatashiga Qaranka

NISA: Hay'adda Sirdoonka iyo Amniga Qaranka

NLF: Madasha Hogaamiyayaasha Qaranka

OHCHR: Xafiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Aadanaha

SIEIT: Kooxda Hirgelinta Doorashooyinka aan Tooska Ahayn ee heer GobolSNA: Ciidamada Qaranka Soomaaliyeed

UNSOM: Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya

UNDP: Barnaamija Horumarinta Qaramada Midoobay

VBIED: Gawaarida lagu soo Rakibo Walxaha Qarxa

## Warbixinta oo Kooban

Warbixintan waxaa si wadajir ah u diyaariyay Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM) iyo Xafiiska Ergeyga Sare ee Qaramada Midoobay u Qaabilsan Xuquuqul Insaanka (OHCHR), waxay ku salaysantahay hawsha kormeerida ah ee Kooxda Badbaadada iyo Xuquuqul Insaanka (HRPG) ee UNSOM. Warbixintu waxay diiradda saaraysaa xadgudubyadii xuquuqul insaanka iyo gabood-falladii la geystay ka-hor, intii lagu gida jiray iyo kadib doorashooyinkii baarlamaanka iyo madaxtooyada ee lagu qabtay Soomaaliya dabayaaqadii 2016kii iyo horraantii 2017kii. Warbixintan waxay ku koobantahay muddada u dhexeysa Agosto 2016 iyo Febraayo 2018.

Kooxda Badbaadada iyo Xuquuqul Insaanka (HRPG) ee UNSOM ayaa warbixintan diyaarisay iyadoo ka duulaysa xilka saaran UNSOM ee ku cad Qaraarka Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay ee tirsigiisu yahay 2158 (2014), kaas oo faraya in "la kormeero, gacan laga geysto baaritaanada loogana warbixiyo Golaha, gacanna laga geysto ka-hortagga wax kasta oo gabood-fal iyo xadgudub ku ah xuquuqul insaanka iyo tacadiyada ka dhanka ah sharciga caalamiga ah ee xilliyada dagaallada ee ka dhaca Soomaaliya".

Shantii sano ee u dambeeysay waxaa guulo waaweyn laga gaaray geedi-socodka nabadeed ee Soomaaliya. Tani waxay ku timid, iyadoo sababo kale ay jiri karaan geedi-socodkii doorasho ee soo billowday bishii Luulyo 2015 kaas oo laga dhaxlay Aqal Sare oo cusub iyo Gole Shacab oo is-bedel lagu sameeyay, kaas oo xubnihiisu aad u kala duwanyihiin, ayna kamid yihiin tiro badan oo haween ah (waxay ahaayeen 14 boqolkiiba sanadkii 2012 halka 2016/2017 la gaarsiiyay 24 boqolkiiba), iyo [weliba] boqolkiiba 50 ay yihiin xubno cusub oo ay ka mid yihiin dhalinyaro. Si kastaba ha ahaatee, haweenka, dadka laxaadkooda dhimanyahay, beelaha laga tiro badan yahay, iyo kooxaha bulshada rayidka ah, ayaa fursad xaddidan u helay amaba aanba u helin ka qeybgalka geedi-socodka doorasho ee ka dhacay dalka oo dhan maadaama uu ahaa geedi-socod siyaasadeed oo ku salaysan wax qaybsiga beelaha.

Doorashadii 2016-ka, oo Qaramada Midoobay ay ku tilmaantay "geeddi-socod siyaasadeed oo leh calaamado doorashooyin", ayaa ahaa geedi-socod marxalad kalaguur oo qabsoomay ka-hor inta aanay si buuxda u dhismin Dowald Goboleedyda Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ah (FMS) iyo ka hor inta aan la dhameystirin dib-u-habaynta dastuurka. Maadaama ay meesha ka maqnaayeen sharcigii iyo nidaamyadii doorasho, ayaa inta badan hanaanka la diyaariyay lagana wada xaajooday intii uu socday geedi-socodka. Hay'adaha iyo hababka shaqo ee doorashooyinka ee la diyaariyay ayaa ahaa kumeel-gaar, waxayna ku salaysnaayeen go'aanada ay soo saareen [xubnaha] Madasha Hoggaanka Qaran (NLF), oo ahayd hay'adda ugu weynayd ee leh go'aan ka-gaarista geeddi-socodka doorashada, Madashaas waxay ka koobnayd Madaxwaynaha Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Madaxda Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ah, Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka ah iyo Ra'iisul Wasaaraha Dowlada Federaalka

Soomaaliya, waxaana sharciyadda Madashaas lagu ansixiyay tiro dhowr ah oo xeerar madaxweyne ah. Maadaama aan horay loo samaynin habka shaqo ee sharciga ah, dowrarka hay'adihii arrintu khusaysay ayaan intooda badan la qeexin, mana jirin daah-furnaan xagga magacaabista saraakiisha maamulaysay doorashada, arrintaas oo caqabado waaweyn ku noqotay geedi-socodka doorasho.

Geedi-socodkii doorashada Soomaaliya ee 2016-kii ma ahayn doorasho leh halbeeg caalami ah, maadaama aanay jirin shuruudihii lagama maarmaanka u ahaa hirgelinta mabda'a qof-iyo-cod ah. Taas bedelkeeda, waxaa jiray nidaam doorasho dadban oo 275 ergooyin doorasho, oo midkiiba uu ka kooban yahay 51 ergo, ay doorteen 275ta xubnood ee Golaha Shacabka. Baarlamaanka cusub ayaa doortay Madaxweyne cusub 8dii Febraayo 2017.

Ka-sokow guulahaas, waxaa jiray amni-darro, hay'ado garsoor oo tabar daran, iyo nidaam aan waafi ahayn ee ilaalinta xuquuqda aadanaha, waxyaabahaas oo qayb ahaan sababay in la waayo isla-xisaabtan ku aaddan xadgudubyada iyo gabood-fallada ka dhanka ah xuquuqul insaanka. Warbixintan waxaa ku jira talo-soo-jeedin lagu saxayo arrimahaas.

Kooxda Badbaadada iyo Xuquuqul Insaanka (HRPG) ee UNSOM waxay diiwaan-gelisay kiisas ku saabsan xadgudubyo iyo gabood-fallo ka dhan ah xuquuqda aadanaha, oo xiriir toos la lahaa geedi socodka doorshada 2016-2017,  oo ay geysteen ciidamada amniga ee dowladda (oo ay ku jiraan Booliska, Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed iyo hay'adaha sirdoonka) ee heerarka federaal iyo maamul goboleedba, iyo sidoo kale kuwo aan ka tirsanayn Dowladda, oo ay ku jiraan Al-Shabaab iyo shakhsiyaad dano ka lahaa doorashooyinka.

Guud ahaan, intii lagu guda jiray muddada warbixintan, UNSOM HRPG waxay diiwaan-galisay 44 kiisas dilal ah oo la xiriira doorashooyinka (41 rag ah iyo 3 haween ah) iyo 4 dhaawac ah (oo dhammaantood rag ah).

Muddadii ka horreysay doorashooyinka iyo muddadii lagu guda jiray doorashooyinka ee ka billaabanaysa Agoosto 2016 ilaa Febraayo 2018, UNSOM HRPG waxay diiwaangelisay 65 kiisas ku xadgudub Xuquuqul Insaan oo si toos ah ula xidhiidha geedi-socodka doorashooyinka, oo ay ku jiraan dilal iyo dhaawacyo, xarig aan sabab lahayn, cabsigelin musharaxiin, iyo xadgudubyo kale oo ka dhan ah xuquuqda ka-qaybgalka. Sodon iyo lix ka mid ah kiisaska ayaa dhacay ka hor doorashadii Madaxweynaha ee 8dii Febraayo 2017 waxaana ka mid ahaa 15 dilal iyo afar dhaawacyo ah, waxaana badanaa ay ka dhasheen weeraro beegsi ah oo rag aan la hayb garana ka geysteen Muqdisho. Dhibbanayaasha waxaa ka mid ahaa musharixiin doorashooyin, xubno ka mid ahaa hey'adaha doorashooyinka, iyo odayaal dhaqameedyo beelo oo caan ahaa kuwaas oo ku lug lahaa ololaha iyo geedi-socodka codeynta. 15 ka mid ah ragga la dilay, 13 ayaa ahaa odeyaal dhaqameedyo caan ahaa, labo kalena waxay ahaayeen ergooyin doorasho.

Tan iyo markii la doortay Madaxweynaha Soomaaliya 8dii Febraayo 2017, rabshadaha la xiriira doorashooyinka ayaa weli sii socday waxaana codeeyeyaasha, odayaal dhaqameedyada iyo dadka

kale ee ka qayb-qaatay geedi-socodka lala beegsaday khaarijin. Muddadii u dhexeysa 13kii Febraayo 2017 iyo 28kii Febraayo 2018, UNSOM waxay diiwaan gashay 29 dilal ah (oo ay ku jiraan 26 rag iyo saddex haween ah); 14 ka mid ah dhibanayaasha ayaa ka qaybqaatay geeddi-socodkii doorashooyinka ee Maamulka Ku-meel-gaarka ah ee Koonfur Galbeed (ISWA), lix qof oo Galmudug ah, iyo sagaal qof oo HirShabelle ah. Inkastoo ilo wareedyo kala duwan ay dilalkaas badankood u tiiriyeen Al-Shabaab, ayaa kooxdu waxay sheegatay sideed kamid ah dilalkaas. Qaar ka mid ah dilalka ayaa u muuqda in ay Al Shabaab ku aargudanaysay, maadaama kooxdu ay si joogta ah ugu hanjabtay in ay bartilmaameedsan doonto ayna dili doonto qof kasta oo ka qaybgala geeddi-socodka doorashada. Dilal kale ayaa u muuqday xifaaltan ka dhexeeyay kooxo siyaasadeed iyo kuwo beelo ama ay suurto gal ahayd inay ka dambeeyeen qaswadayaal.

Hay’adaha Dowladda Soomaalida ma baarin inta badan xadgudubyada iyo gabood-fallada ka dhanka ah xuquuqul insaanka ee la xiriira geedi-socodka doorashada. 44 ka mid ah dilalka loo geystay odayaal dhaqameedyada iyo ergooyinka doorashada (15 ka mid ah waxaa la diley marxaladdii ka horreeyay doorashadda iyo 29 ka mid ah marxaladdii ka dambeysay codbixinta), laba kiis oo kaliya ayaa laga gun gaaray oo waxaa lasoo xiray dacwadna lagu oogay labo la-tuhunsane oo Al-Shabaab ah, laguna kala maxkamadeeyay Muqdisho 21kii Agosto 2017 iyo Baydhaba 21kii Juun 2017.

Iyadoo aan waxba loo dhimayn midnimada dhuleed ee Soomaaliya, ayaa warbixinta waxaa sidoo kale kamid ah qayb ku saabsan doorashadii madaxtooyada ee 2017 ee lagu qabtay Somaliland 13kii Nofeembar 2017, taas oo ka duwanayd tii ka dhacday Soomaaliya inteeda kale, oo waxaa loo maray nidaam cod bixin oo qof-iyo-cod ah. Geedi-socodkan oo markiisii hore la qorsheeyay bishii Juun 2015, ayaa la kulmay dib-u-dhacyo ballaaran oo ay sababeen khilaafaad siyaasadeed, arrimo farsamo iyo dhibaatooyin bani'aadamo oo ka dhashay abaarti. Bilihii Oktoobar iyo Nofeembar 2017, UNSOM waxay diiwaangelisay xadgudubyo xuquuqul insaan oo la xidhiidha doorashooyinka Somaliland, oo ay ku jiraan adeegsi awood oo ay adeegsadeen ciidamada amniga kana dhan ah dibad-baxayaal, arrintaas oo sababay 20 khasaarooyin (saddex dhimasho ah iyo 17 dhaawac ah). Mid ka mid ah dhacdooyinkaasi, ayaa ciidamada ammaanku waxay rasaaseeyeen oo ay dhaaweceen siddeed qof oo rayid ah gobolka lagu muransanyahay ee Sanaag, dadkaas oo ku guda jiray dibadbax nabadeed oo la xiriiray doorashooyinka dabayaaqadii bishii Oktoobar 2017. Intii ay socdeen doorashooyinka, waxay u muuqataa in muwaadiniin badan oo ka diiwaan gashanaa saddexda xarumood ee doorashooyinka ee goobaha lagu muransan yahay ee Sool iyo Sanaag aan la siinin fursad ay ku codeeyaan sababtuna ahayd xiisadaha sii kordhayay ee u dhaxeeyay Puntland iyo Somaliland. Intii ay socdeen banaanbaxyadii dhacay bartamihii Nofeembar 2017 ee ka dambeeyay doorashada, boolisku waxay toogteen oo ay dileen saddex qof oo rayid ah, sagaal kalena waxay ku dhaaweceen magaalooyin kala duwan oo Somaliland ka tirsan. Walaacyada kale ee xuquuqul insaanka waxaa ku jira kadeed gelin iyo xarig loo geysto siyaasiyiinta mucaaradka ah iyo shaqaalaha warbaahinta.

Warbixintan waxaa lagu soo af-meeray talooyin ku saabsan in Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo beesha caalamku hirgeliyaan tallaabooyin looga hortegayo xad-gudubyada ka dhanka ah xuquuqda aadanaha ka hor doorashooyinka 2020-2021. Tani waxaa ka mid ah horumarinta nidaamyada sharci iyo hababka shaqo ee hay'adaha lagama maarmaanka u ah qabsoomidda doorashooyin xor ah, caddaalad ah, daah-furan, loo wada dhanyahay lana aamini karo, marka la gaaro 2020-2021, doorashooyinkaas oo muwaadiniintu ku naaloon karaan xuquuqdooda ka-qaybgalka arrimaha dadweyne si toos ah ama iyagoo u maraya dad iyaga metela oo si xor ah loosoo doortay. Warbixintu waxay sidoo kale ku talinaysaa in madaxda Somaliland ay dib-u-eegis iyo falanqayn buuxda ku sameeyaan geedi-socodkii doorasho ee 2017, gaar ahaan xadgudubyadii ka dhanka ahaa xuquuqul insaanka ee la xiriiray doorashooyinka, kuwaa oo dhacay ka-hor, intii lagu guda hiray iyo kadib maalintii codaynta.

## III. Habka Cilmi Baarista

UNSOM HRPG waxay diyaarisay warbixintan iyadoo la tixraacayo waajibaadka UNSOM sida hoos timaada Golaha Amniga ee qaramada midoobay 2158 (2014), kaas oo looga baahan yahay UNSOM "in ay kormeerto, gacan ka geysto baaritaanka iyo in ay warbixinta u soo gudbiso Golaha, iyo inay ka caawiso ka hortagga xadgudub kasta ama ku xadgudubka xuquuqda aadanaha ama xadgudubyada sharciga caalamiga ah ee bini'aadannimada ee ka dhacay Soomaaliya. "

UNSOM HRPG waxay kormeeraysay hannaanka doorashooyinka lagana soo bilaabayo habka xulashada barlamaanka, bishii luuliyo 2016, iyo doorashadii madaxweynenimada ee horraantii Febraayo 2017, waxayna sii waday diiwaangelinta xadgudubyada dhacay doorashada ka dib ilaa February 2018. Muddadaa gudaheeda, UNSOM HRPG waxay diiwaangelisay 65 kiis oo xadgudubyo la xiriira xuquuqda aadanaha ah iyo rabshado si toos ah ula xiriira hanaanka doorashooyinka, oo ay ku jiraan 44 dil iyo afar dhaawacyo ah, xiritaan aan sharci ahayn, cabsi galinta musharrixiinta, iyo xadgudubyada kale ee xuquuqda ka qaybgalka iyo nabadgelyada. 36 ka mid ah kiisaska, oo ay ku jiraan 15 dil iyo afar dhaawac ah, ayaa dhacay intii u dhaxaysay July 2016 iyo 8dii Febraayo 2017. Kiisaska haray ayaa waxay ahaayeen dhammaan weerarradii lala beegsaday doorashooyinka, taasoo keentay in 29 qof oo rayid ah ay dhinteen ka dib doorashadii madaxweynenimada, Febraayo 2017 ilaa Febraayo 2018.

UNSOM HRPG waxaa ay isticmaashay oo hagaayay habka OHCHR ee kormeerka xuquuqda aadanaha, iyadoo loo eegayo qaabka doorashada. Marka la diiwaan gelinayo kiisaska, UNSOM HRPG waxay ugu yaraan ubaahan tahay saddex ilood oo madaxbanaan si ay u xaqiijiso xadgudubyada xuquuqda aadanaha.

Inkastoo nabadgelyo la'aanta jirta ay si xaddidan u xaddideyso galaangalka, UNSOM HRPG waxay ka heshay macluumaadkan dadki dhibanayaasha ahaa, qaraabadooda, odayaasha beelaha dhibanayaasha, booliiska, maamulka degaanka, iyo/ama markhaatiyaasha. UNSOM HRPG waxay sidoo kale isticmaashay ilo kale oo ku saabsan ururinta macluumaadka sida dadka deegaanka u dhashay iyo ururrada caalamiga ee aan dawliga ahayn, saxafiyiinta, shabakadaha difaacayaasha xuquuqda aadanaha, iyo hay'adaha Qaramada Midoobay.

UNSOM HRPG waxay diiwaangelisay xogta ku saabsan dhibanayaasha ka soo qeyb qaatey doorashooyinka sida ergooyinka doorashada, waxay ahaayeen odayaasha beelaha oo ku lug lahaa wadaxaajoodka xulashada ergooyinka, ama doorka kale oo ka mid ahaa geeddi-socodka doorashada. Waxaa la barbardhigay macluumaadka dukumiintiga ah ee ku saabsan dhibbanayaasha ay saameeyeen weerarrada la xidhiidha nidaamka doorashooyinka ee liiska ay hayso ee kooxda isku dhafka ah ee UNSOM/UNDP Taageerada Doorashooyinka ee (IESG), iyada oo labada diiwaanba la ogaaday inay iswaafaqsan yihiin.

Intaa waxaa dheer, UNSOM HRPG waxay dib u fiirisay macluumaadka dokumantiyada, oo ay ku jiraan liisaska rasmiga ah ee ergooyinka doorashada ee ay diyaarisay IESG, iyagoo u hubinaya gobol gobol iyo qabiil qabiil si loo xaqiijiyo in dhibanayaashu ay dhab ahaantii ahaayeen codbixiyayaasha doorashooyinka. Si kastaba ha ahaatee, ergooyinkaliiska wakiillada lama helin tiro yar oo ka mid ah gobollada/qabiilada iyo magacyo ayaa ka maqnaa liisaska qaar. Sidaa awgeed, UNSOM ma aysan ku darinwarbixinteeda macluumaadka aan la soo xaqiijin ama laga soo xaqiijin liisaska ergooyinka ama ilo kale, oo ay ka mid yihiin qaraabada dhibanayaasha iyo odayaasha beelaha. Sidaa daraadeed, xadgudubyada la xidhiidha doorashooyinka ee lagu soo bandhigay warbixinta maahan mid sinaba u dhamaystiran waxaana ka mid ah oo keliya kuwa UNSOM HRPG ay u suurtagashay inay diiwaangeliso iyada oo ku saleynaysa warbixinteeda habkeeda u gaarka ah iyo ilaha kale ay heli karto.

Doorashadii madaxweynanimo ee Somaliland waxaa la qabtay bishii Nofeembar 2017 si ka madaxbanaan nidaamka doorashooyinka ee DFS. UNSOM HRPG waxay si dhow ula shaqeysay maamulka Somaliland iyo hay'adaha kale ee maxaliga ah si ay u ururiyaan macluumaadka ku saabsan xadgudubyada xuquuqda aadanaha ee ku saabsan doorashooyinka iyo xadgudubyada kale ka hor, intii lagu jiray iyo ka dib hawlgalka hanaanka doorashooyinka.

## II. Xaaladda guud

**Xaaladda Guud ee Xuquuqda Aadanaha.**

1. Dhibaatada colaadaha hubeysan ee muddada dheer ku soo jirtey Soomaaliya iyo maqnaanshaha hey'addaha dowliga ah ee ka maqan dalka oo idil ayaa waxay sababeen inay saameyn xun ku yeeshaan xuquuqda aadanaha iyo xaaladda bani'aadamnimada. Weerarada lala beegsado dadka rayidka ah iyo kaabayaasha rayidka ah, gaar ahaan kuwa ay geystaan Al-Shabaab, iyaaga oo u isticmaalaya is-qarxinta is-miidaaminta iyo aalado qarxa oo la macmalay (IEDs), ayaa had iyo jeer socda. Laga soo bilaabo 1dii Janaayo 2017 ilaa 31 Disembar 2017, UNSOM waxay diiwaan gelisay 2,811 dhibaato soo gaarey dadka rayidka ah (1,378 qof oo rayid ah iyo 1,433 qof oo dhaawac ah), 62 boqolkiiba oo loo aqoonsaday iney geysteen Al-Shabaab, 13 boqolkiiba miliishiyaadka, boqolkiiba siddeed ay geysteen dawlad-goboleedyada, saddex boqolkiiba dhibaatooyinkaasi waxaa geystay ciidamada Hawlgalka Midawga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM), iyo 14 boqolkiiba waxaa geystay xubno kale ee aan la cayimin ama aan la sheegin.[1]

2. Dhacdooyinka qaraxyada ismidaaminta ah, qaraxyada lagu soo xiro gaadiidka(VBIEDs), iyo weerarrada kale ayaa sii kordhaya laga bilaabo 270 sannadkii 2016 ilaa 413 sannadka 2017, taas oo sababtay 1,335 dhibaatooyin ah oo ay ku jiraan 481 dhimasho (marka la barbar dhigo 296 ee sannadka 2016). Dhibbanayaasha dhibtu soo gaartey 595 waxay ahaayeen dad rayid ah; 391 ayaa la dilay, 204 wey dhaawacmayn. Isla muddadan (laga bilaabo Jannaayo ilaa 31 Disembar 2017), weerarrada qaraxyada (IED) ismidaaminta ee la la beegsaday shaqaalaha rayidka ah iyo saraakiisha la soo doortay waxay gaareen ilaa 53 dhibaatooyin, oo ay ku jiraan 17 dhimasho iyo 36 dhaawac ah. Xarumaha dadweynaha ee qaybo ka mid ah koonfurta Soomaaliya ayaa ah kuwa ugu badan ee lala beegsado qaraxyadaas gaar ahaan gobolka Shabeellaha Hoose, iyadoo 122 weerar ah laga geystay, iyo gobalka Banaadir oo laga geystay 87 weerar.

3. Colaaddaha hubaysan iyo nabadgelyo-xumada ka jirta waxay saameyn weyn ku yeelatay doorashooyinka waxayna ahayd mid ka mid ah carqaladihii hor istaagay in la qabto doorasho hal qof iyo hal cod ah. Siyaasiyiinta, xubno ka tirsan hay'adaha dawladda, iyo jaaliyadaha bulshada rayidka ahi waxay ahaayeen (oo waliba sii socta) in si gaar ah ay u bartilmaameedsanayeen Al Shabaab iyo kooxaha kale ee hubaysan ee ka soo horjeeda geeddi-socodka hanaanka siyaasadeed.

4. Hannaanka doorashooyinka ee 2016-2017 ayaa dhacay xilli Soomaaliya aysan lahayn xisbi siyaasadeed sababo dib u dhac ku yimid fulinta sharciga Xisbiyada Siyaasadeed ee Soomaaliya. Ururada siyaasadeed ee hada jira ee DFS ayaa ku eedeeyay in si ula kac ah loo

---

[1] Laga soo bilaabo 1dii Jannaayo 2016 ilaa 14 Oktoobar 2017, UNSOM waxay diiwaangelisay guud ahaan 4,585 oo khasaaro rayid ah oo (2,078 la dilay iyo 2,507 qof oo dhaawac ah), 60 boqolkiiba oo loo aaneeyey Al-Shabaab, 13 boqolkiiba miliishiyaanka, 11 boqolkiiba waaxyaha dawladda, afar boqolkiiba boqol Hawlgalka Midawga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM), iyo 12 boqolkiiba dadka kale oo aan la ogeyn ama aan la garanayn. ("Badbaadinta Rayidka: Dhisidda Hay'adda Nabadgalyada, Amniga iyo Xuquuqda Aadanaha ee Soomaaliya" oo ay soo saartay UNSOM/OHCHR bishii December 2017, at https://www.ohchr.org/Documents/Countries/SO/ReportProtectionofCivilians.pdf).

daahiyo soo gudbinta Sharciga Xisbiyada Siyaasadeed ee loo soo gudbin lahaa Baarlamaanka Federaalka waxayna soo gudbiyeen dacwad ka dhan ah Ra'iisal Wasaarihii [2]hore oo ay u soo gudbiyeen Maxkamadda Sare 21kii Janaayo 2016. Baarlamaanka Federaalku wuxuu ansixiyay Sharciga Xisbiyada Siyaasadeed 6-da Juun 2016. Golaha Hoggaanka Qaranka, oo ah hay'adda ugu weyn ee go'aaminta geeddi-socodka doorashooyinka ayaa waxay ku heshiiyeen - sida ku xusan warbixintii 9kii Agoosto 2016 - si kor loogu qaado loona dardar geliyo hannaanka xisbiyada siyaasadeed mudo laba sano gudahood ah, laga bilaabo maalinta la ansaxiyey Baarlamaanka Federaalka ah ee 10aad (27-kii bishii diiseembar 2016) taasi macnaheedu yahay in la dhameeyo hab-dhaqameedka ku salaysan awood qeybsiga qabiilka ee 4.5[3] Si loo gaadho ujeedadaas, Heshiiska Shirweynaha Hogaanka Qaranka ayaa u tilmaamey in xubnaha Baarlamaanka ay saxiixaan cadeyn qoraal ah oo sheegaya in ay ku biiri doonaan xisbiyada siyaasadeed dabayaaqada sanadka 2018.

[2] Cumar Cabdirashid Cali Sharmarke

[3] Qaabka 4.5 waa heshiis awood qeybsi oo u dhexeeya Soomaalida oo u kala qaybiya afar qabiil oo waaweyn iyo kooxo qabiilo yaryar. Waxay siineysaa qoondada isku midka ah ee afarta qabiil ee "waaweyn", iyo nus-u-dhigga qabaa'ilada 'qabiil tirada yar'. Mana ahan saldhig sharci ah, waxaana loo qorsheeyay sidii xal ku meel gaar ah loogu heli lahaa.

**Hannaanka Doorashooyinka ee 2016 ka**

5. 2013 ki Heshiiska Cusub ee Somalia ayaa lagu sheegay in doorashooyinka 2016-ka ay yihiin muhiimadda ugu weyni, inkastoo aysan sheegin habka loo marayo geedi socodka.[4] DFS waxay ku nuuxnuuxsatay baahida loo qabo qaab-dhismeed doorasho oo wanaagsan iyo ka-qaybgalka ballaaran oo ay ka qeyb qaataan Shacbiga Soomaaliyeed halki ay 135- oday-dhaqameed ay soo doorteen 275 xubnood oo ka tirsan Baarlamaanka Federaalka doorashadii 2012-ka. Heshiiska Cusub ayaa wuxuu sidoo kale carabka ku adkeeyay baahida loo qabo in la dhiso guddi doorasho oo madaxbannaan oo waafaqsan dastuurka ku meel gaarka ah ee Soomaaliya, iyo ansixinta sharciyada la xidhiidha meel marintiisa, oo ay ka midka yihiin xisbiyada siyaasadda iyo diiwaangelinta codbixiyayaasha.[5]

6. Bishii Luulyo 2015, ayaa waxaa cadaatey in Soomaaliya aysan qaban karin doorasho toos ah sababo kala duwan awgood, oo ay ku midka yihiin amni darro, diiwaangalinta cod-bixiyayaasha oo aan jirin, wadahadalada socda ee dhismaha dowlad gobaleedyada, iyo hanaanka dib-u-eegista dastuurka.[6] Kadib- Madaxwaynaha DFS ayaa sidoo kale xusay[7] in xukuumaddiisu aysan waligeed ballan qaadin in hal qof, hal cod ay qabaneyso laakiin waxay doonaysay "geedi socod fudud oo dheeri ah"[8]marka loo eego midka uu isaga ku qabtay xukunka.

7. Xubnaha ugu muhiimsan ee DFS iyo Maamul Gobaleedyada ayaa aasaasay Golaha Wadatashiga Qaranka (GWQ), oo ah hay'ad ka kooban laanta fulinta iyo sharci dejinta ee DFS, wakiilada Dowlad gobaleedyada iyo bulshada rayidka, si loo qeexo qaabka doorashooyinka ee 2016ka. GWQ waxay soo saareen Mabaadi'da lagu hagayo midkaas oo lagu ansaxiyey Shir[9] heer sare loo soo agaasimay ee lagu qabtay Muqdisho bishii July 2015.[10]

8. Golaha Wadatashiga Qaranka waxay qabteen wada tashi badan,[11] laakiin waxay ku guuldareysteen in ay isku raacaan qaabka doorashada. Sidaas darteed DFS waxay soo jeedisay in ay 275 xildhibaan baarlamaani ah u qoondayso Aqalka Hoose kuna salaysan awood qeybsi qabiil oo ah 4.5 waxayna dejisay ugu yaraan boqolkiiba 30 kuraasta kuwaas oo loo qoondeeyey haweenka.[12] Waxaa la soo jeediyay in codeynta iyo tirinta ay dhici doonto mid kasta oo ka mid ah caasimadaha Maamul gobaleedyada ee hadda jira iyo kuwa cusub, iyada

[4] PSG1, Mudnaanta 3aad: Diyaargarow iyo qabashada doorashooyin lagu kalsoonaan karo illaa 2016.

[5] 5http://eeas.europa.eu/archives/new-deal-for-somalia-conference/sites/default/files/the_somali_compact.pdf; Qodobka 47aad ee Dastuurka ku meel gaarka ah ee Baarlamaanka Federaalka wuxuu xilsaarayaa Aqalka Baarlamaanka Federaalka si uu u ansixiyo sharciyada gaarka ah ee qeexaya xeerarka ku saabsan xisbiyada siyaasadeed, diiwaangelintooda, doorashooyinka heer Federaal iyo Guddiga Madax-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka (NIEC).

[6] Fiiri Heshiiska u dhexeeya Dowladda Federaalka iyo Baarlamaanka Federaalka, http://www.villasomalia.gov.so/wp-content/uploads/2015/10/Facilitation-Guide.pdf

[7] Wareysiga VOA Somali 29 July 2015

[8]http://www.voanews.com/a/somalia-says-no-popular-elections-in-2016/2883749.html

[9] http://www.villasomalia.gov.so/communique-high-level-partnership-forum-mogadishu-29-30-july-2015/

[10] http://www.villasomalia.gov.so/wp-content/uploads/2015/10/Facilitation-Guide.pdf

[11] La tashiyo ayaa la qabtay intii u dhaxaysay Oktoobar 2015 iyo Janaayo 2016 magaalada Muqdisho, Jubbaland, Galmudug, Maamulka Koonfurta Galbeed (ISWA) iyo Safaaradda Soomaaliya ee Nairobi, Kenya.

[12] Goobaha DFS ee loogu talagalay qaabka hanaanka doorashooyinka ee 2016, oo la soo bandhigay intii lagu gudajiray Shirwaynaha Qaranka ee Muqdisho, 24 Jannaayo 2016. http://www.villasomalia.gov.so/communique-on-the-electoral-model-for-2016/

ooo Somaliland loogu talagalay hab gaar ah.[13] Soo jeedinta sidoo kale waxaa ka mid ahaa dhisidda Aqalka Sare oo ga gooban 54 xubnood (oo ay ku jiraan 30 boqolkiiba haweenka) kuwaas oo lagu dooran doono gudiyada iyo shirarka xubnaha dowlad gobaleedyadda.[14]

9. Hoggaamiyeyaasha siyaasadeed ee Soomaaliya ayaa si isku mid ah u isku raacay Shirweynihii Koowaad ee Wadatashiga Dastuurka Qaran ee dhacay Diisambar 2011 (oo loo yaqaano Mabaadi'da Garoowe I)[15] ujeedaduna aheyd in 4.5 ay marnaba noqonin aasaaska awood qeybsiga mustaqbalka siyaasadeed marka laka reebo muddada ay jirto Dowladda Federaalka Soomaaliya ee 2016-ka. Hoggaamiyayaasha siyaasadda Soomaaliya ayaa ku celceliyay taageeradooda ah inay soo afjaraan habka awood qeybsiga ah ee 4.5 Shirwaynahii labaad ee ka wadatashiga Dastuurka oo dhacay bidhii Febraayo 2012 (Mabaadi'da Garoowe 2) [16] waxayna ku heshiiyeen in nidaamka doorashooyinka ee aqalka hoose uu ku salaysnaado mabda'a saamiga.

10. Xoojinta Heshiiska Mabaadi'daha Garoowe, Dawladda Puntland waxay si xoog leh uga soo horjeedday qaaciddada ku salaysan awood qeybsiga qabiileed eek u dhisan 4.5 waxayna ku riixday qaab-dhismeed degaaneed.[17] DFS iyo Puntland waxay gaadheen heshiis bishii Abriil 2016, iyaga oo taageero ka heleya beesha caalamka, hanaanka 4.5 ayaa loo qoondeeyay doorashooyinka Aqalka Hoose, iyada oo la go'aamiyey in wakiillada Aqalka Sare ay si toos ah loogu soo doorto Maamul gobaledyada.[18]

11. Qaababka hanaanka doorashooyinka 2016-ka ayaa lagu heshiiyey kadib saddexdii kulan isdaba jooga ahaa ee Golaha Wadatashiga Qaranka.[19] Hogaamiyayaasha qaranka Soomaaliya waxay ku heshiiyeen hirgelinta dhabta ah ee geeddi-socodka doorashooyinka, oo ay ku jiraan qaababka, waqtiyada, liiska odayaasha beelaha, tirada xubnaha ka qeyb qaadanaya Ergada Doorashada, iyo sida iyo ciddii u maamuli laheyd. Mid ka mid ah arrimaha ugu welwelka badnaa ayaa ahaa liiska 135 odayaal dhaqameed oo mas'uul ka ahaa xulashada musharixiinta, taasoo oo GWQ xaqiijisay bishii Juun 2016. Liiska la ansixiyay ayaa lagu dhaleeceeyey in laga saaro ama lagu daro "khaladaadka" iyo qaar ka mid ah qabiillada ayaa ku eedeeyey in xubnaha Golaha Wadatashiga Qaranka ay farageliyeen ayna hor istaageen qabiilkooda arrimaha la xiriira doorashada wakiiladooda. Madaxwaynaha DFS ayaa si gaar ah loogu eedeeyay in uu mas'uul ka ahaa in la tirtiro hoggaamiyeyaasha beesha sida Ugaas oo ka tirsan qabiilka Xawaadle, kuwaasi oo la sheegey in ay khilaaf xoogan kala kulmeen madaxweynaha arrimo oo ku saabsan dhismaha dawlad-goboleedka Hiiraan.

[13] Iyadoo doorashooyinka xubnaha labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka ah lagu qabtay caasimadaha DFS, wakiillo ka socda Somaliland ayaa la siiyay qorshe gaar ah oo ay 11 xubnood iyo 46 xubnood oo Aqalka Hoose ah lagu doortay magaalada Muqdisho sababtoo ah xukuumadda Somaliland waxay qaadacdey doorashadii geedi socodka

[14] http://www.villasomalia.gov.so/communique-on-the-electoral-model-for-2016/

[15] https://www.hiiraan.com/PDF_files/GAROOWE%20CONSTITUTIONAL%20CONFERENCE%2021-23%20DEC11.pdf

[16] https://reliefweb.int/report/somalia/second-somali-national-consultative-constitutional-conference

[17] Wareysi uu la yeeshay Voice of America 28 Febraayo 2016, madaxweynaha Puntland ayaa naqdiyay qaabka uu sheegayo in aanay sii socon karin.

[18] https://horseedmedia.net/2016/04/04/agreement-between-the-federal-government-of-somalia-and-the-government-of-puntland-state-of-somalia/

[19] Shirarka MHQ ayaa lagu qabtey Muqdisho (9-12 April, iyo 29 Maajo-2aad Juun) iyo Baydhaba (22-25 Juun)).

12. Arrinta kale oo lagu muransan yahay waxay ahayd in laga saaro Aqalka sare gobolka Banaadir (oo ay ku jirto Muqdishu), inkasta oo ay tahay gobolka ugu dadka badan Soomaaliya sida laga soo xigtay sahanka tiragoobka qiyaasta tirada dadka ee UNFPA 2014.[20] Go'aankani wuxuu si gaar ah u saameeyey bulshada ku nool Banaadir ku waas oo aan heysan cid ku matasaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka.[21] Bishii Juun 2016, GWQ waxay shir ku qabteen Baydhabo si ay wax uga qabato arrintan waxaana ay soo jeedisay in bulshada Banaadiri loogu daro laba xildhibaan oo dheeraad ah oo ku matala Aqalka Sare.[22] Hase yeeshee, soo jeedinta lama fulin sida lagu heshiiyey iyada oo bulshada Banaadiri aan hadda weli ku laheyn wakiil Aqalka Sare. Sababta ugu weyn ee looga soocay arrintan gobolka Banaadir waxay ahayd maadaama ay xubnaha Aqaalka Sare ay soo doorteen Maamul gobaleedyada, halka gobolka Banaadir uusan ka mid ahayn Maamul gobaleedyada iyo xaaladda Muqdisho iyo gobolka Banaadir (oo ay ka mid tahay ka mid noqoshada) oo aan weli lagu go'aamin Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah.[23]

13. Go'aanka Golaha Wadatashiga Qaranka ee ku saabsan qaabka doorashooyinka ayaa muhiim u ah geeddi-socodka doorashada dhaci doonta, inkastoo geeddi-socodka iyo hanaanka oo dhan uu yahay mid dastuuri ah oo ka baxsan qaab-dhismeedka sharci ee hadda jira. Go'aanka Golaha Wadatashiga Qaranka ma aysan ansixin Baarlamaanka Federaalka, laakiin waxaa lagu fuliyey go'aankii madaxweynaha.[24]iyada oo Qaar ka mid ah xubnaha Baarlamaanka Federaalka ku adkeeyeen kuna eedeeyeen go'aanka madaxweynaha inuu yahay mid aan dastuuri ahayn,[25] Halka xubno muhiim ah oo ka tirsan beesha caalamka, oo ay ka mid yihiin Qaramada Midoobay iyo Midowga Yurub ay taageereen,[26] In kasta oo uu maqan yahay sharciga saxda ah, nidaamkana waxaa loo tixgeliyey iyada oo leh rabitaan dhab ah ee la doonayo in horey loogu socdo, waana la ansixiyay loona hirgeliyey fahamka in uu yahay xal ku meel gaar ah.

14. Laba hey'adood aan rasmi ahayn oo ku-meel-gaadh ah ayaa la aasaasay si loo maamulo doorashada: Guddiga federaalka Fulinta Doorashooyinka Dadban (FIEIT) ee heer qaran, iyo guddiga gobaleedka Hirgelinta Doorashooyinka ee aan tooska ahayn (SIEIT) ee heerka gobolka. FIEIT[27] waxay ka koobnayd 22 qof oo Soomaali ah oo caan ah[28] mas'uuliyaddooda

[20] https://somalia.unfpa.org/sites/default/files/pub-pdf/Population-Estimation-Survey-of-Somalia-PESS-2013-2014.pdf, last accessed 26 March 2018

[21] Bulsho Soomaali ah oo laga tirada badan yahay iyo kuwa ugu da 'weyn ee magaalada Muqdisho iyo aagagga xeebaha ee u dhow gobolka Banaadir.

[22] http://doorashada2016.so/wp-content/uploads/2016/09/MHQ-Communique-Baidoa_June-2016_English.pdf. Last accessed 12 June 2018

[23] Sida ku xusan qodobka 9-aad ee Dastuurka ku-meel-gaarka ah, xaaladda magaalada caasimadda Soomaaliya waa in lagu go'aamiyaa hannaanka dib-u-eegista dastuurka, labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waa inay dejiyaan sharci gaar ah oo la xiriira arrintan.

[24] http://doorashada2016.so/wp-content/uploads/2016/09/160522-Presidential-Decree-on-Electoral-Model_English.pdf last accessed 18 December 2017

[25] http://www.voanews.com/a/somali-elections-on-track-for-august-despite-opposition/3341767.html

[26] http://www.radiodalsan.com/2016/05/22/the-international-community-welcomes-somali-president-move-to-bypass-parliament-on-elections/

[27] Warbixin ay soo saartey MHQ 12kii Abriil ayaa ku dhawaaqay in qaabka FIEIT ay noqon doonto 17 xubnood, iyada oo shan xubnood ay soo magacawday DFS iyo laba xubnood ee maamul gobaleed waliba. Sidoo kale fiiri go'aamada madaxweynaha ee ku saabsan magacaabidda FIEIT. http://doorashada2016.so/wp-content/uploads/2016/09/Presidential-Decree-Appointing-FIEIT-English-translation-1.pdf last accessed 27 March 2018

[28] Toban ka mid ah waxaa loo magacaabay Guddiga DFS halka 12 kale oo ay magacaabeen Dowladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federalka

ugu weyni waxay ahayd inay kormeeraan qorshaha geeddi-socodka doorashooyinka. [29]SIEIT kasta waxay ka kooban yihiin 11 xubnood iyo lixda SIEITs ayaa loo aasaasay in ay hirgaliyaan geeddi-socodka heer gobolka ah[30]. Xubnaha FIEIT iyo SIEIT ayaa looga baahday inay ukala shaqeeyaan si madaxbannaan si looga fogaado khilaafaad daneysi ah. Waxaa sidoo kale looga baahan yahay inay sii wadaan doorka latalinta xaga farsamada iyo in aysan laheyn qorshe siyaasadeed ama iney iyagaba aheyn musharaxiin u taagan xilka doorashooyinka.[31] Iyadoo ay jirto shuruudahan, hadana waxaa maqan daahfurnaanta xulashada xubnaha Guddiyada FIEIT iyo SIEIT xubnahaas oo aragtidooda inbadan ku baahiyey GWQ ayaa iyagana inbadan saameeyn ku lahaa xulashada xubnahaas.

15. Maaddaama ay jiraan dhibaatooyin leh xag dhaqaale, amni iyo siyaasadeedba oo ay ku jiraan hanaanka dhisitaan maamul gobaleedyada, geeddi-socodkii doorashooyinka 2016-ka ayaa qaatey dhowr bilood in ka badan intii hore loo kugu qorsheeyay. Sida laga soo xigtay GWQ,[32] doorashadii madaxweynenimo ayaa aheyd inay dhacdo 30kii Oktoobar laakiin dib loo dhigay, ugu horrayntii 30kii Nofeembar 2016, iyo mar kale la qorsheeyey 22kii Janaayo 2017.[33] Madaxweynaha hada jira ayaa la soo doortay 8 Febraayo 2017.

16. Ugu dambeyn, doorashadii 2016-ka, oo ay Qaramada Midoobay ku tilmaamtey "geeddi-socod siyaasadeed oo leh hanaan doorasho," waxay ahayd geedi socod ku-meel-gaar ah oo dhacay ka hor intaan la helin dhismaha dawlad-goboleedyada iyo dib-u-habeeynta dastuurka.[34] Maqnaanshaha sharci ama qawaaniin u gaar ah doorashada, badi qaababka ayaa la horumariyay lana wada xaajoodey ka hor inta geedi socodka Doorshada. Haya'daha iyo qaab-dhismeedka loogu talagalay doorashooyinka ayaa ahaa kuwo ku meelgaar ah, iyagoo ku salaysan go'aanada GWQ laguna ansixiyay oo keliya qaraar taxane ah oo soo saarey madaxweynaha. Xaqiiqda ah in qaab-dhismeedka sharci aan horey loo sameyn iyo doorarka hay'adaha ku haboon ay yihiin kuwo aan wali la ogeyn, iyo in magacaabista mas'uuliyiinta aysan aheyn mid hufan taasi oo carqalad la taaban karo ku ah geeddi-socodka doorashada.

[29] http://doorashada2016.so/en/federal-indirect-elections-implementation-team/ last accessed 27 December 2017
[30] Siddeed ka mid ah ayaa waxaa soo magacawday Dowladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federalka iyo saddexda FGS.
[31] http://doorashada2016.so/en/state-indirect-electoral-implementation-team-sieit/
[32] Kulan lagu qabtay Muqdisho laga bilaabo 2 ilaa 9 Ogosto 2016: http://www.villasomalia.gov.so/communique-national-leadership-forum/
[33] FIEIT iyo SIEITs ayaa ku dhawaaqay taariikhaha cusub ee war saxaafadeed ay soo saareen 29kii September 2016.
[34] Wakiilka Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qarammada Midoobay (SRSG) Michael Keating, Taageeridda Soomaaliya sida ay uga soo baxdo Sanadihii colaada, https://tmblr.co/ZaTV2m2COS14B

## III. Hanaanka Sharci

17. Qawaaniinta iyo sharciyada caalamiga ah ee ku saabsan doorashooyinka iyo xuquuqda aadanaha waxaa laga helayaa Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha iyo Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Madaniga iyo Siyaasadda kuwaasi ay Soomaaliya ay qeyb ka tahay.[35]

18. Waa in la damaanad qaadaa Xuquuqda la xidhiidha doorashooyinka iyo xuquuqda kale ee ka midka ah Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Madaniga iyo Siyaasadda oo ay ka midka tahay xuquuqda aasaasiga ah ee nolosha,[36]aan lagu ciqaabi karin jidh-dil ama ciqaab, bini-aadannimada ka baxsan ama sharaf-ridid, ama ciqaab,[37] xorriyadda iyo amniga,[38] xuquuqda xoriyada hadalka, ururada nabadda iyo ururo,[39] ka ilaalinta xiriga sharci darada ah iyo xabsi daa'in,[40] takoorid la'aanta, xaq u lahaanshaha inuu codeeyo iyo ka qeyb kalka doorashada, iyo xuquuqda xoriyadda dhaqdhaqaaqa.

19. Qodobka 25 ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Madaniga iyo Siyaasadda wuxuu damaanad qaadayaa xaqa ah in " ka qayb qaataan dhaqanka/ dhaqdhaqaaqa arrimaha guud ee dadweynaha, si toos ah ama iyada oo loo marayo wakiillo si xornimo ah loo soo doortey ", waxaana ka mid ah xuquuqda codbixinta iyo u istaaga " Doorashooyin dhab ah, kaas oo noqon doona codbixin guud ahaan wadanka iyo mid loo wada siman yahay, waana in lagu codbiyaa codbixin qarsoodi ah ". Qodobka 25-aad wuxuu cadeynaya in loo bahan yahay doorashooyinka dimuqraadi ah ee dawladeeda taasi oo lagu saleynayo oggolaanshaha shacabka. Laguna dabaqaa Mabda'a hal qof iyo hal cod, codka hal codbixiye waa inuu u dhigmaa codka mid kale oo ka mid ah nidaamka doorashooyinka ee gobol kasta.[41] Si loo hubiyo in si buuxda loogu riyaaqay ilana dhowrey xuquuqda ku xusan qodobka 25, isgaarsiinta macluumaadka iyo fikradaha ku saabsan arrimaha dadweynaha iyo siyaasadda ee u dhexeeya muwaadiniinta, musharaxiinta iyo wakiillada la doortay waa muhiim. Tani waxay muujineysaa saxaafad xorta ah iyo warbaahin kale oo awood u leh inay faallo ka bixiyaan arrimaha guud ee dadweynaha iyada oo aan la xakameyn ama xannibaad iyo inay u sheegaan ra'yiga dadweynaha. Waxay u

---

[35] Soomaaliya waxay ku biirtay Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Madaniga iyo Siyaasadda sanadkii 1990

[36] Qodobka 6 ee ICCPR

[37] Qodobka 7 ee ICCPR

[38] Qodobka 9 ee ICCPR

[39] Qodobka 21 iyo 22 ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Madaniga iyo Siyaasadda waxay xaqq u leeyihiin xuquuqda xoriyada isu imaatinka iyo ururrada nabaddeed, siday u kala horreeyaan, kuwaas oo keliya marka laga reebo xayiraadaha, marka la eego xaaladaha gaarka ah, "marka danta qaranka amaba nabadgelyada guud, amniga bulshada, ilaalinta ee caafimaadka dadweynaha ama asluubta, ama ilaalinta xuquuqda iyo xorriyadda dadka kale. "Tani waxa ay xaqiijisay qodobka Golaha Qaramada Midoobay Xuquuqda Aadanaha ee qaraarkiisa yahay15/21 oo ku saabsan xuquuqda xoriyada isu imaatinka nabdeed iyo ururada kuwaas ay dib u waceen dowlad gobaleedyada 'waajibka ah' in la ilaaliyo xuquuqda dadka oo dhan si ay si nabadgelyo ah isugu xiraan oo ay u gulmaan si xor ah, oo ay ku jirto hanaanka doorashooyinka ", Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Xalinta A / HRC / Res / 15/21 6 Oktoobar 2010, farqada 1.

[40] Qodobka 9aad ee ICCPR waxay sheegeysa in qof kastaa uu xaq u leeyahay xorriyadda iyo amniga qofka. Qofna looma ciqaabi karo xarig aan sharci aheyn ama xabsi. Qofna looma diidi karo xorriyadiisa marka laga reebo sababahaas oo kale iyo sida waafaqsan nidaamka noocan oo kale ah oo sharcigu dhigayo.

[41] Guddiga Xuquuqda Aadanaha, Qormo Guud 25, far. 21; Fikradaha Guud ee ku xusan qodobka 40, farqada 4, ee ICCPR ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Madaniga iyo Siyaasadeed, ee uu ansixiyay Guddiga Kulankoodii 1510, U.N. Doc. CCPR / C / 21 / Rev.1 / Add.7 (1996). Waxay so saareen fikrada ah "in uu soo saaro xuduudaha doorashooyinka iyo qaabka loo qoondeynayo codadka waa inaysan khaldaneynin qaybinta codbixiyayaasha ama kala takoori kara koox kasta, waana inaysan ka saari karin ama aan xakamayn karin xaqqa muwaadiniinta in ay si xor ah u doortaan wakiilladooda"

baahan tahay raaxo buuxda iyo ixtiraamka xuquuqda loo leeyahay ee ku xusan qodobada 19, 21 iyo 22 ee Axdiga, oo ay ka mid yihiin xorriyadda in ay si firfircoon uga qayb galaan dhaqdhaqaaq siyaasadeed shaksi ahaan ama midka ururada siyaasadda iyo ururro kale, xorriyadda ka doodista arrimaha guud, qabashada banaanbax nabadeed iyo kulanno, si loo dhaleeceeyo ama looga soo horjeesto, ama la daabaco qoraalo siyaasadeed, ololaha doorashooyinka iyo xayeysiis ku saabsan fikradaha siyaasadeed[42].

20. Qodobka 5 (c) Heshiiska Caalamiga ah ee Ka Hortagga Dhamaan Noocyada Takoorka Jinsiga wuxuu damaanad qaadayaa in Dowlad Goboleedyadda ay ku heshiiyeen in ay mamnuucaan oo ay tirtiraan dhammaan nuucyada kala duwan ee midab-takoorka iyo inay ilaaliyaan xuquuqda qof walba, iyada oo aan loo kala soocin jinsiyada, midabka, ama qaran ama asalka qowmiyadeed, iyo in loo siman yahay sharciga hortiisa, gaar ahaan marka laga hadlayo xuquuqda siyaasadeed ee hada socta, gaar ahaan xuquuqda kaqaybgalka doorashooyinka - si loo codeeyo ama ay u istaagaan doorasho lagu saleynayo codeynta guud iyo mid loo siman yahay, si ay uga qaybqaataan Xukuumadda iyo sidoo kale dhaqdhaqaaqyada dhinac kasta ee arrimaha bulshada iyo in ay si siman ay dadweynuhu u helaan adeegga.

21. Soomaaliya waa qayb ka mid ah Axdiga Xuquuqda Aadanaha iyo Dadyowga ee Afrika, kaas oo xoojiya oo difaacaya xuquuqda muwaadiniinta in si ay si xor ah uga qaybgalaan dowladaha dalalkooda, si toos ah ama iyada oo loo marayo wakiillo ay si xor ah u soo doorteen, iyo in ay adeegga dadweynaha ee wadamadooda si siman u helaan.[43]

22. Dastuurka Ku-meelgaarka ah Federaalka ee Soomaaliya wuxuu damaanad qaadayaa xuquuqda asaasiga ah ee nolosha,[44] xuquuqda kaqeybgalka arrimaha bulshada, sameysiga xisbiyo siyaasadeed, kaqeybgalka hawlaha xisbiyada siyaasadeed, iyo in loo doorto jago kasta oo ka tirsan xisbi siyaasadeed.[45] Xuquuqaha kale ee lagu sharraxay Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee Soomaaliya waxaa ka mid ah mamnuucista xariga sharci-darrada ah[46] iyo ilaalinta xorriyadda hadalka iyo aragtida [47] taasi oo xambaarsan xorriyadda hadalka iyo xorriyadda warbaahinta, oo ay ku jiraan dhammaan noocyada warbaahinta elektaroonigga ah iyo wergeysyada ku saabsan.

23. Baarlamaanka dowladda Federaalka Soomaaliya wuxuu soo saaray Hindise-sharciyeedka Qaran ee Xisbiyada Badan. Sharciga ayaa la ansaxiyey 4-tii Sebtembar 2016-ka. Sharcigu wuxuu mamnuucayaa xisbiyada siyaasadeed inuu noqdo mid lagu saleeyey qabiil waxaana loo baahan yahay inay yeeshaan qorshe qaran ee siyaasadeed,hogaamiye matala, iyo xubin ka mid noqashadiisu lagu saleeyey saddex meelood laba meelood gobollada Soomaalida ah oo xadkoodu la ansaxiyey 1991.[48]3dii Diisambar 2017, Guddiga Madaxa-bannaan ee

[42] Ibid, para. 25
[43] Xeerka Afrika ee Xuquuqda Aadanaha iyo Dastuurka, Qodobka 13, wuxuu ansaxiyey Soomaaliya 31 July 1985.
[44] Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah, Qodobka 13aad
[45] Dastuurka Federaalka ee Ku-meelgaarka ah ee Soomaaliya, Qodobka 22aad. Xuquuqda Ka Qeybgalka Siyaasadeed
[46] Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah ee Soomaaliya, Qodobka 15. Xorriyadda iyo Amniga Qofka
[47] Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah ee Soomaaliya, Qodobka 18aad. Xorriyadda Hadalka iyo Fikradaha

[48] Soomaaliya waxay ka kooban tahay 18 gobol oo leh 90 degmo ka hor burburkii dowladdii dhexe sanadkii 1991

Doorashooyinka Qaranka (GMDQ) ayaa bixiyey shahaadooyin diiwaangalin ku-meel-gaadh ah todoba xisbi, oo ay ka mid yihiin hal xisbi ay hogaamiso haween.[49]Tani waa qeyb ka mid ah u diyaargarowga doorashooyinka 2020-2021 waana midey tahay in loo arko guul weyn, maxaa yeelay nidaamka siyaasadeed ee xisbiyada badan ee Soomaaliya ayaa dhammaaday 1969.[50]

[49] Fawzia Haji Aden - Wasiirka Arrimaha Dibadda ee hore ee DFS
[50] http://archive.ipu.org/parline-e/reports/arc/SOMALIA_1969_E.PDF last accessed 31 December 2017

## IV. Xadgudubyada Xuquuqul Insaanka ee la Xiriira Xaaladda Hanaanka Doorashooyinka

24. Laga soo bilaabo Agoosto 2016 ilaa Febraayo 2018, UNSOM HRPG waxay diiwaangelisay 36 kiis oo ku saabsan xadgudubyada xuquuqda aadanaha iyo tacadiyo la xidhiidha hannaanka doorashooyinka, inta badan waxay ka dhaceen Muqdisho, oo ay ku jiraan dilalka iyo dhaawacyada looo geystay dadka rayidka ah, xarig sharci daro ah, cabsi galinta musharrixiinta, iyo xadgudubyada kale ee la xiriira geedi socodka doorashooyinka, taas oo ah guuldarada in la baaro oo la xukumo iyo xaqa loo leeyahay daaweyn wax ku ool ah. Shan iyo toban qof ayaa la dilay (dhammaan waa ragg) iyo afar kale ayaa la dhaawacay (dhammaan waa ragg), badanaaba weerarada waxaa geysta rag hubeysan aan heybtooda la aqoon Mogadishu ku daheeda ah. Dhibbanayaasha waxaa ku jiray musharaxiinta doorashooyinka iyo xubno ka tirsan hay'adaha doorashada, ama kooxo ama qabiilo ku lug leh ololaha iyo habka codeynta. 15 ka mid ah dadka la dilay, 13 waxay ahaayeen Odayaal caan ah. Kadib dhammaadkii doorashadii madaxweynenimo ee Soomaaliya, weerarada ka dhanka ah dadki ka qaybgalay doorashooyinka ayaa sii socday halka UNSOM HRPG ay diiwaan geliyeen dilalka bartilmaameedka ah ee 29 odayaasha beeleed iyo ergeyaal doorasho, oo ay ku jiraan saddex dumar ah.

25. Inta u dhaxaysa August 2016 iyo 8 Febraayo 2017, ciidamada ammaanka, oo ay ka mid yihiin ciidamada bilayska, hay'adaha sirdoonka, [51] iyo Ciidanka Qaranka Soomaaliyeed (SNA) ayaa xarig sharci daro ah u geystay lix qof (afar ka mid ah Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed, mid ka mid ah Kismaayo iyo hal kalana Beledweyne), iyaga oo laga hor istaagayoka qeybqaadashada geeddi-socodka siyaasadeed. Intaa waxaa dheer, UNSOM waxay diiwaangelisay 5 xaaladood oo cabsi gelin iyo xad gudub haweenka musharrixiinta ah ama shaqaalaha doorashooyinka ay kala gulmeen xubnaha Dawladda ama xubno ka tirsan qabiiladooda.

26. Haweenka, dadka naafada ah, qabiilooyinka yaryar, beelaha laga tirada badan yahay, iyo kooxaha bulshada rayidka ahi ayaa koobnayd ka qaybqaadashada wadatashiyada lagu go'aaminayay hanaanka doorashooyinka mana awoodi karin in ay kormeer ku sameeyaan hannaanka doorashooyinka ee dalka oo dhan, maadaama ay ahayd geedi socod siyaasadeed oo ku salaysan hab awood qeybsi qabiil.

27. Kulammada siyaasadeed ee qabaa'ilka iyo kooxaha kale ayaa la mamnuucay ama xadidnaa bixinta amarrada loo baahanyahay milkiilayaasha hoteellada si ay u helaan oggolaansho hore oo loogu talagalay shirarka oo ka yimaada maamulka, iyo xaddidaadda suurtagalnimada in ay abaabulaan ama olole ka sameeyaan goobaha muhiimka ah ay ka midka yihiin Mogadishu iyo gobolka Hiiraan. Intaa waxaa dheer, warbaahinta ayaa laga xadiday ka qeyb kalka munaasabadaha la xiriira doorashooyinka la xaddiday iyada oo la soo saaray amarro ku aaddan sababaha la xiriira amniga oo ay soo saareen maamulka ay ka mid yihiin DFS.

[51] Hay'adda Sirdoonka iyo nabadsiguda Qaranka (NISA), Hay'adda Nabadsugidda iyo Amniga Jubbaland (JISA).

**Xaqa Nolosha iyo Badqabka Jirka**

28. Laga soo bilaabo Agoosto 2016 iyo 8 Febraayo 2017, UNSOM HRPG waxay diiwaangelisay 13 dhacdo oo sababtay dhimashada 15 qof oo rayid ah iyo dhaawacyo afar kale oo rayid ah oo loo maleynayo in ay ku lug yihiin hannaanka doorashada: 11 kamida dhacdoooyinkaas ayaa ka dhacay Muqdisho, hal Galmudug, iyo hal Kismaayo. Saddex iyo toban ka mid ah dhibbanayaasha ayaa ka qaybqaatay geeddi-socodka doorashooyinka, labada kalana waxay ahaayeen odeyaal caan ah oo ku lug leh nidaamka xallinta khilaafaadka beelaha ee la xidhiidha hannaanka doorashada. Inkasta oo doorka gaarka ah iyo heerka ka qaybgalka qaar ka mid ah dhibbanayaashii geeddi-socodka aysan mar walba caddayn, waxaa la soo sheegay in odayaasha beelaha, haddii aaney dhab ahaantii ku jirin liiska wakiilada codbixiyeyaasha, hadana waxay muhiim u ahaayeen geeddi-socodka siyaasadeed ee qabiilka, iyo fac tirsiga qabiilkooda. Qaar ka mid ah kaalintooda ayaa ka mid ahaa caawinta xallinta khilaafaadka ku saabsan geeddi-socodka doorashooyinka ee qabaa'ilka iyo xulashada 51-ka wakiil ka socda qabaa'ilka, kuwaas oo u codeeyay xubnaha golaha hoose ee Baarlamaanka Federaalka.

29. Toban ka mid ah dilalka ayaa lala beegsaday, iyadoo qaar ka mid ah ay ka dhacaan guryaha dhibbanayaasha. Saddex dhibbane ayaa lagu dilay weerar abaabulan oo ismiidaamin iyo ciidamo wadajiraleh ah oo ay Al-Shabaab ku qaadday hoteel ku yaala Muqdisho (taas oo sababtay guud ahaan dhimashada 67 qof oo rayid ah) halkaas oo ay ka soo qaybgaleen kulan la xidhiidha doorashada 25kii Janaayo 2017. Laba dil ayaa ka dhacay saldhigyada cod-bixinta: Wakiil ka tirsan ergada ayaa la toogtay oo ay dileen xubno ka tirsan ciidamada ammaanka kadib markii uu muran dhexmaray, halka ergay uu diley ergay kale.

30. inkasta oo la xaqiijiyay in dhamaan dhibbanayaashu ay la xiriiraan geeddi-socodka doorashooyinka, ujeedada weerarrada ma cadda. Waxaa la fahamsan yahay in lacago badan lagu kala qaatey intii lagu gudajiro geedi socodka doorashooyinka, iyo khilaafaadka shakhsiyeed ee ka dhexeeya kooxaha iska soo horjeeda iyo siyaasiyiinta ayaa sababi kara dilalka 15 ka mid ah dilalka, hal kiis oo keliya ayaa sababay in la xiro laba qof oo dembiilayaal ah, kuwaa oo looga shakisan yahay in ay yihiin xubno ka tirsan Al Shabaab. Waxaa la qabtay intii lagu jiray iska horimaad ciidan oo ka dhacay degmada Wadajir ee magaalada Muqdisho isla markiiba kadib dilka nin oday ah 2 November 2016.

31. Bishii Nofeembar 2016, UNSOM HRPG waxay ka diiwaangelisay dhacdooyin ay sababeen dhaawacyo afar qof oo rayid ah (oo ay ku jiraan nin oday iyo xubin ka mid ah shaqaale doorasho), Muqdisho, Jowhar, iyo Garoowe. 5tii Nofeembar 2016, Garoowe, Puntland, xubin ka mid ah shaqaalaha maamulka ayaa ku dhaawacmay israsaaseyn u dhaxeeysay labo malashiyo - mid daacad u ah Guddoomiyihii hore ee Booliska iyo mid kale oo u qaabilsan Agaasimaha Sirdoonka Puntland. Wax tallaabo ah laguma qaadin si loo baaro ama loo xiro kuwa soo maleegay. Isla maalintaas, muwaadin kale oo rag ah oo la sheekay inuu ka tirsanaa ergada ayaa la dhaawacay waxaana sabab u ahaa Wasiir Ku-xigeenka Amniga Puntland ka dib muran dhex maray oo ku saabsan magacaabidda xubnaha ergada doorashada ee magaalada Garoowe. Dhibbanaha iyo Wasiirka ayaa ka soo jeeda hal qabiil isla markaana aan wax talaabo ah laga qaadin si loo baaro dhacdada. 18kii Nofeembar 2016, nin dhallinyaro ah ayaa si xun

ugu dhaawacmay gudaha xarunta codbixinta markii ilaalo ka tirsan ilaaliyayaasha wasiirka dhalinyada iyo Isboortiga ee Dowlada Federaalka Soomaaliya ay rasaas ku fureen gudaha xarunta doorashada ee magaalada Jowhar, Shabeellaha Dhexe. Waardiyayaasha ayaa lagu soo warramayaa inay doonayeen in ay carqaladeeyaan tirinta codadka, maadaama ay caddaatey in wasiirka uu ku guul dareystay doorashada. Dhacdadan ayaa ku khasabtay Kooxda Fulinta ee aan tooska ahayn ee Doorshada Federaalka inay joojiso doorashadii kursigaas. Wasiirka Dhallinyarada ayaa markii dambe helay kursigiisa markii doorashada dib loo bilaabay. 11kii Disembar 2016, rag hubaysan oo aan la aqoonsan ayaa toogtay kuna dhaawacay nin oday ah degmada Wadajir ee magaalada Muqdisho. Odeygu wuxuu ahaa cod-bixiye u ahaa qabiilkiisa kursiga Aqalka Hoose ee magaalada jowar, Hirshabeele.

32. Tan iyo markii doorashadii madaxtinimada laqabtay 8 Febraayo 2017, rabshaduhu way sii socdeen, wufuuddii iyo kuwii kale ee ka qayb qaatay geeddi-socodkan ayaa lagu lala beegsadaa dilalka qorshaysan. Intii u dhaxaysey 13kii Febraayo iyo 28 Febraayo 2018, UNSOM HRPG waxay diiwaan gelisay 29 dil (26 rag ah iyo saddex dumar ah). Afar iyo toban ka mid ah dhibanayaashu waxay ka qaybgaleen doorashadii Koonfur Galbeed, lix qof waxay ahayeen Galmudug, iyo Sagaalna Hirshabelle. Dhibbanayaasha waxaa ka mid ahaa nin 82 jir ah oo si cad dilkiisa Alshabaad ugu fulisay magaalada Awdheegle, Shabeellaha Hoose, ka qaybqaadashada geeddi-socodka doorashooyinka "baarlamaanka riddada ah"[52] awgeed. In kastoo 29-ka dil ee la geystey ilo kala duwan ay kunisbeeyeen Al Shabaab, Al Shabaab ayaa si rasmi ah u sheegatay mas'uuliyadda sideed ka mid ah dilalka oo kaliya. Si kastaba ha ahaatee, Al Shabaab waxay si joogta ah ugu hanjabtay in ay beegsan doonan ayna dilaan qof kasta oo ku lug lahaa hannaanka doorashada.[53]

33. In kasta oo eedeeymaha loo soo jeediyay Al-Shabaab iyo sheegashadooda dilka wufuudda iyo ka-qaybgalayaasha kale ee geeddi-socodka doorashooyinka, sababo kale oo aan ahayn Mabd'a ayaa la soo jeediyay in lagu beegsado ergooyinka doorashada, oo ay ka mid yihiin dhaqaalaha, danaha beesha iyo ujeedooyin kale[54]. 29kii il ee la geystay xilligii doorashada kadib, ayaa hal is kaliya yaa dhalay xarig iyo dacwad qaadid: saddex tuhmane oo Al-Shabaab ah ayaa lagu lagu maxkamadeeyay magaalada Baydhabo, Koonfur Galbeed, dilka odayga 15-kii Juun 2017. Lix maalmood kadib markii la xidhay, Maxkamadda millatariga ee Baydhabo ayaa midkood ku xukuntay dil iyo laba kale oo xabsi daa'in. Laga soo bilaabo 28kii Febraayo 2018, baadhis lama sameyn, waxna looma soo xidhin 28ka dil ee doorashada ka danbaysay.

**Xaqa Xorriyadda iyo Amniga iyo jirdilka iyo hab-dhaqanka arxan darrada leh**

34. Inkastoo ay jirto ilaalin dastuuri iyo caalami ah oo ka dhan ah xidhitaanka iyo xabsi galinta aan sharciga ahayn, lix qof ayaa si aan toos ahayn loo xidhay oo ay xidheen xoogaga ammaanka iyagoo la xiriirinaayo doorashooyinkii dhacay intii u dhexeeyay 22kii Sebtembar

[52] Wareysiyada lala yeeshay Weriyeyaasha muhiimka ah, 20 Maarso 2017.
[53] https://www.youtube.com/watch?v=BJwuw-H0mgs (Al Jazeera wareysi Ingiriis ah oo la yiraahda AS Ali Ali Raghe bishii Janaayo 2017 ku saabsan geeddi-socodka doorashada iyo booska AS.)
[54] Kulanka UNSOM oo la yeeshay Kooxda ka hortagga xasaradaha Caalamiga ah, 31 Maajo 2017

2017 iyo 22kii November 2017: afar ka mid ah waxay ka dhaceen Koonfur Galbeed, mid ka mid ah Kismaayo, midna Beledweyne.

35. 24kii Oktoobar 2016, xoogaga ammaanka ayaa kuxidhay Beledweyne musharaxa Aqalka Hoose ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waxayna haystayn dhawr saacadood ka hor intii aan la sii dayn. Musharaxa ayaa loo xidhay kulan siyaasadeed oo uu la yeeshay odayaasha qabiilkiisa si uu u taageero musharaxnimadiisa. Ciidamada ammaanka ayaa la sheegay inay u hanjabeen isaga oo uga digeen in inuu joojiyo dhaqdhaqaaqyada noocaas, musharaxiina wuxuu a noqday musharaxnimadiisa. 4tii Nofeembar 2016, ciidamada ammaanku waxay ku xidheen Kismaayo musharaxa kursiga Aqalka Hoose amar la'aan waxayna ku haysteen saldhiga shan saacadood. Waxay ku eedeeyeen inuu khilaaf ka dhex abuuray cod-bixiyeyaasha, taasoo keentay in la dilo mid ka mid ah 51-ka xubnood ee Ergada doorashada 4-tii bishii November 2016-kii. 22kii Nofeembar 2016, afar wafdi ayaa lagu war geliyay UNSOM HRPG in laqabtay laguna xidhay saldhiga bilayska ee Baydhabo si looga hor istaago in ay tagaan xarunta codbixinta maalintii cod bixinta. 26kii Nofembar, xubnaha SNA waxay xidheen caaqil qabiil oo u socdaalay Muqdisho si ay uga qayb qaato la-talasho ku saabsanayd doorashooyinka magaalada Baraawe ee Shabeellaha Hoose. Ilo ayaa sheegay in xidhitaankiisa uu ahaa mid siyaasadeed oo uu ka danbeeyay xubin ka tirsan Baarlamaanka Federaalka, kaas oo sidoo kale ha ahaa Wasiir Ku-Xigeen Dawlada Federaalka Soomaliya. Dhammaan maxaabiista ayaa la sii daayay 24 saacadood gudahood, taas oo soo jeedinaysa in xidhitaanka ujeedadoodu ahayd inay ka hortagaan ololaha ama ka qaybqaataan hawlaha la xidhiidha doorashooyinka.

---

*"24kii Oktoobar 2016, ciidamada ammaanka ayaa iga soo qabtay hoteel ku yaal bartamaha magaalada halkaas oo aan qorsheynayey inaan kula kulmo odayaasha beeshayda. Waxaa la i geeyay saldhigga bilayska oo ay suaalo igu weydiyeen saddex sarkaal oo heer sare ah oo ka tirsan saraakiisha milatariga kuna saabsanaa kulankayga aan la yeelanayay odayaasha iyo qorshahayga si aan ugu tartamo kursiga loo qoondeeyey qabiilkayga ee Golaha Aqalka Hoose ee Baarlamaanka Federaalka. Waxaa la I sii daayay dhawr saacadood kaddib oo la igu amray inaanan qaban shirar iyada oo aan fasax layga siinin maamulka degaanka. Maalin ka hor dhacdadan (23 Oktoobar 2016), nin baastoolad sitay ayaa Iigu hanjabay shan qof oo kale hortooda. dhacdooyinkan awgood waxaan go'aansaday inaan ka noqdo musharaxnimadayda." WaraysiUNSOM HRPG la yeelatay dhibane 11kii November 2016.*

---

36. Shan dhacdo oo cabsi-galin ah iyo handadaada oo la xidhiidha doorashooyinka ayaa sidoo kale la diiwaangeliyey. Dhamaan dhibanayaashu waxay ahaayeen haween, halka kuwa lagu eedeeyay ay ahaayeen saraakiisha dawladda (oo ay ku jiraan laba Wasiiro oo ka tirsan dawlada federaalka soomaliya), xubnaha ciidamada amniga, iyo shakhsiyaadka lala xidhiidhinayo musharixiinta oo ay taageerayaan hoggaamiyayaasha muhiimka ah. Saddex dhacdooyin ayaa ka dhacay Jubbaland, mid ka mid ahna Koonfur Galbeed, iyo mid Muqdisho ah (oo ku lug leh xubin ka tirsan Guddiga fulinta doorasha heer qaran).

37. Jubbaland, laba haween oo musharixiin ah oo u tartamayay Baarlamaanka Federaalka iyo mid kale oo u tartamaysay Aqalka Hoose ayaa sheegay in handadaad iyo cabsi gelin loo gaystay, sidaa awgeedna ay ka noqdeen musharaxnimadooda. Mid ka mid ah ayaa ka cabatay in beesheedu ay ku cadaadiyeen in ay ka baxdo iyada oo loo eexanayo nin ka tirsanaa Baarlamaanka. Waxay kaheshay telefoonkeeda farriimo ku eedaynaya iyada inay "adeegsanayaan" qabiilada kale kuna amray inay isaga baxdo Jubbaland. Kadibna waxay u wareegtay hudheel si ay u badbaado, laakiin suuragal la'aanta socodka xorta ah ayaa saamayn ku yeelatay awoodeeda inay samayso ololе ay tageero ku hesho. Musharaxa labaad, oo ka soo jeeda Kismaayo, ayaa musharaxnimadeedii Aqalka Hoose iska daysay 15kii Nofembar 2016, ka dib markii ay cabsi geliyeen xubno ka tirsan Hay'adaha Sirdoonka iyo Amniga ee Jubbaland (JISA) iyo qaar ka mid ah qabiilkeda. Waxaa looga digay in aanay ka qaybgalin doorashooyinka qabiilkeeda, cidna aysan uga dacwoonin. Labadan dhacdooyin midna lagama gudbin cabasho rasmiya. Kiis saddexaad ayaa dhacay 7dii Nofembar 2016, markii gabadh musharax ka ahayd Baydhabo ay ka tagtay musharaxnimadeedii Aqalka Hoose ka dib markii laga soo wariyay in ay cabsi geliyeen oo ay u hanjabeen xubno ka tirsan dadka loo soo xulay in ay xubnaha baarlaamka oortaan. Waxay isla markaana ku cambaaraysay in aanay jirin daahfurnaan ku aadan habka doorashadu u cosoto.

38. Baydhabo, 19kii Oktoobar 2016, ayaa haweeney u loolamaysay baarlamanka ayaa lagu dhibaateeyay, lagu cabsi geliyay laguna xidhay saldhigga bilayska Baydhab taaso ay ku xidheen ciidamada ammaanka iyo madaxda sare ee dawladda si ay uga hor istaagan gelitaanka xarunta codbixinta. Sidaa darteed, may awoodin inay ka qayb gasho doorashooyinka Aqalka Sare ee Baydhabo.

39. 19kii Nofeembar 2016, xubin haween ah oo ka tirsan Guddiga Madaxa Banaan ee Fulinta doorshada heer Qaran ayaa ku sheegtay wareysi ay la yeetay idaacad FM ah oo ku taala magaalada Muqdisho in Wasiiru Dowlaha Gaashaandhigga - oo sidoo kale ah Guddoomiyaha Guddiga Wadajirka ee Ciidamada Qaranka Soomaaliya - inuu ugu yeedhay iyada kana dalbaday in ay joojiso kormeerka dhaqdhaqaaqyada doorashooyinka ee la xidhiidha qabiilkiisa, isagoo oo ku hanjabay inuu dili dooni haddii ay ku guuldareysato inay sidaa yeesho[55]. Waxay codsatay ilaalinta Dowladda Federaalka Soomaaliya, laakiin waxaa la soo sheegay in bilaysku ku guuldareysteen inay baadhaan sheegashadaas. Wasiirkii hore ayaa dib loogu soo celiyay isla booski dawlada cusub ee federaalka soomaliya 21-kii Maarso 2017[56].

## Xaqa Xorriyadda Fikradda (ra'yiga) iyo Hadalka

40. Sharciga Soomaaliya iyo kan caalamiga ahba waxay xaqiijinayaan xuquuqda xorriyadda ra'yiga iyo hadalka, kuwaas oo ay ku jiraan xuquuqda ah xog laga helo arrimaha danaha dadweynaha, iyo saxafiyiinta iyo dadka kale inay awood u yeeshaan inay hawlahooda si xor

[55] https://goobjoog.com/dhageyso-xubin-ka-tirsan-guddiga-doorashada-oo-uu-wasiir-dowladda-ka-tirsan-handaday/ last accessed on 28 March 2018.
[56] Wasiirka iyo gabadha xubin ka ah FIELT waxay kazoo wada jeedan hal beel, cabsi gellintuba waxay kusalaysnayd siyaad ugaara ahayd beeshooda manay ahayn mid la xidhiidha xuquuqdeeda dumarnimo eek a qaybgalka geedi socodka

ah u fuliyaan si ay u xaqiijiyaan in dadweynuhu helaan macluumaad[57]. Tani waa arrin lagama maarmaan u ah geeddisocodka siyaasadeed haddii dimoqraadiyad shaqeyneysa oo waxtar leh loo baahan yahay, gaar ahaan waqtiyada isbedelka siyaasadeed[58].

41. Weerarrada, cabsigelinta, iyo qaababka kale ee dhibaataynta iyo farogelinta ciidamada amniga ee dawladda iyo sidoo kale Al-Shabaab, iyo kuwa kale waxay badanaa u muuqdaan inay aamusiyaan suxufiyiinta iyo shaqaalaha kale ee warbaahinta, difaacayaasha xuquuqda aadanaha iyo hoggaamiyeyaasha siyaasada, iyaga oo ku riixaya iska-faafreebaan arimaha loo tixgeliyo inay yihiin xasaasi, oo ay ku jiraan doorashooyinka, musuqmaasuqa, xaaladaha xuquuqda aadanaha, iyo dibad-baxyada bulshada[59]. Tacaddigan wuxuu hor istaagay macluumaadka xorta ah, taas oo wax u dhimeysa awoodda muwaadiniinta inay ka faa'iidaystaan kana qaybqaataan geeddi-socodka dimoqraadiyadeed iyadoo la adeegsanayo go'aano ay ogyihiin oo ku saabsan arrimo badan oo kala duwan.

42. Laga soo billaabo Agoosto 2016 ilaa Febraayo 2017, UNSOM HRPG waxay diiwaangelisay 90 dhacdo oo ah xadgudubyo ka dhan ah xaqa h xoriyadda hadalka, oo ay ku jiraan 55 xadhig aan sharci aheyn iyo xabsi sharci-darro ah, iyo weerarrada suxufiyiinta iyo shaqaalaha warbaahinta oo keenay 26 dhacdooyin oo dhaawac iyo dhimasho leh (1 dhimasho iyo 25 dhaawacyo), iyo xidhitaanka shan xaruumood oo warbaahineed. Waxaa jiray xidhitaankii ugu sarreeyey bishii Oktoobar 2016 iyo Febraayo 2017, oo ay dhaceyn 22 iyo 14 xidhitaan siday ay u kala horeeyaan. Inkasta oo aaney dhammaan kiisaska si toos ah ula xidhiidhin doorashooyinka, iyo inkasta oo dhacdooyinka ugu badan ee lagu beegsanayo suxufiyiinta iyo kuwa warbaahinta ay ka dhaceen Somaliland (oo aan ka qaybqaadan geeddi-socodka doorashada ee DFS), hoos-u-dhaca goobaha dimoqraadiyadu waa muujiye muhiim ah Dabeecadaha dawladaha ee xakamaynta xoriyadda ra'yiga iyo muujinta.

[57] Qodobka 19aad ee ICCPR wuxuu bixiyaa in qof kastaa uu xaq u leeyahay inuu qaato fikrado aan la faragalin karin iyo xuquuqda xorriyadda hadalka, oo ay ku jirto xorriyadda "raadinta, helida iyo gudbinta macluumaadka iyo fikradaha nooc kasta". Qodobka 18aad ee Dastuurka Soomaaliya wuxuu damaanad-qaadayaa xorriyadda ra'yiga iyo hadalka, oo ay ku jirto xoriyadda hadalka iyo warbaahinta.

[58] Faallooyinka Guud no.25 ka mid ah Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Qaramada Midoobay ayaa sharraxaya xuquuqda xoriyada hadalka, isu imaatinka nabaddeed iyo ururrada inay yihiin shuruudaha aasaasiga ah ee hirgalinta hirgelinta xuquuqda codbixinta iyo hoosta ka xariiqaya xuquuqdaas waa in si buuxda loo ilaaliyo. Faallooyinka Guud no. 34 ee isla guddigaas ayaa ku nuuxnuuxsaday in xorriyadda ra'yiga iyo xorriyadda hadalka ay yihiin xaalado aan laga maarmayn oo ku aaddan horumarka buuxa ee qofka, waana u saldhig kunoolanshaha buuxa ee xuquuqda aadanaha ee kale. Tusaale ahaan, xuquuqda xorriyadda hadalka ayaa ah mid muhiim u ah ka faa'iideysiga xuquuqda xoriyada isu imaatinka shirarka iyo ururada.

[59] A / HRC / 24/23, para. 3. Eeg qaraarka Golaha Ammaanka 2222, para. 6 (2015) oo ku baaqay in la ilaaliyo suxufiyiinta, shaqaalaha xirfadlayaasha warbaahinta iyo shaqaalaha la xidhiidha xaaladaha khilaafaadka hubaysan, iyo in la hubiyo xisaabtanka dambiyada laga galay iyaga, iyaga oo tixgelinaya doorka muhiimka ah ee suxufiyiinta, xirfadlayaasha warbaahinta iyo shaqaalihiisu ay ka ciyaari karaan "ilaalinta dadka rayidka ah iyo ka hortagga iskahorimaadka iyaga oo u hoggaansamaya hababka digniinta ugu horeysa ee lagu aqoonsado iyo soo wargelinta xaaladaha suurtagalka ah ee keeni kara xasuuqa, dembiyada dagaalka, nadiifinta jinsiga iyo dembiyada ka dhanka ah aadanaha. 6 wuxuu u baahan yahay maraakiibta Qaramada Midoobey in ay ku daraan waajibaadkooda warbixinta ku saabsan ficilada gaarka ah ee rabshadaha ka dhanka ah suxufiyiinta, xirfadlayaasha warbaahinta iyo shaqaalaha la xidhiidha xaaladaha dagaalka hubaysan. 60 A / HRC / 24/23, para. 4. 61 Booqo UNSOM / OHCHR 2016 warbixinta guud ee ku saabsan xorriyadda faafinta: Ku dadaalida sidii loo sii wadi lahaa xoriyadda dimoqraadiyadda ee ku-meel-gaadhka siyaasadeed ee Soomaaliya:
http://www.ohchr.org/Documents/Countries/SO/UNSOM_FreedomExpressionReport_Aug312016.pdf
http://www.ohchr.org/EN/NewsEvents/Pages/DisplayNews.aspx?NewsID=20445 last accessed on 28 December 2017.

43. Laga soo bilaabo Agoosto 2016 iyo Febraayo 2017, hal saxafi ayaa lagu dilay weerar lala beegsaday, 25 saxafiyiin iyo shaqaale warbaahineed ah ayaa ku dhaawacmay laba weerar oo kala duwan oo ay sheegteen Al-Shabaab oo ka dhacay labo hotel oo marti-galinayay munaasibado laxidhiidha doorashooyinka ee magaalada Muqdisho.

44. Waxaa intaa dheer, in 55 qof ay si aan habooneyn loo xidhxidhay oo ay xidheen mas'uuliyiinta Soomaalida iyaga oo la xadhiidha xoriyadda hadalka, oo ah 49 wariye iyo shaqaalaha warbaahinta, hal qof difaaca xuquuqda aadanaha ah iyo saddex siyaasiyi. Labada gabdhood ee dhallinyarada ah ee Somaliland ayaa sidoo kale la xidhay laguna xidgay gabayadooda iyagoo soo dhaweynaya doorashooyinka Soomaaliya.

*Hey'adda Sirdoonka iyo Ammaanka ee Jubbaland (JISA) ayaa xidhay oo xabsi galisay saddex saxafiyiin TV oo magaalada Kismaayo ku yaala intii u dhaxaysay 12kii iyo 14-kii Bishii 6aad ee 2016, iyaga oo lagu eedeeyay in ay faafinayaan xog been abuur ah kadib warbixintii ay ka diyaariyeen in ciidamada ammaanka Jubbaland qabsadeen goob cod bixin si ay uga mudaharaadaan mushahar laantooda. Ugu dambeyntii waa la sii daayay iyada oo aan dacwad lagu soo oogin.*

45. Shan goobood oo warbaahineed (afar xarumo raadiye iyo hal wargeys) ayaa la xidhay ama la hakiyey intii u dhexeysay bishii Agoosto 2016 ilaa Febraayo 2017 sababo ay ka mid yihiin eedeeymaha ay hayaan maamulku "Oo gacan ka geysanaya nabadgelyo-xumo" ama ayadoo ay ugu wacan tahay warbixintooda weerarrada Al-Shabaab.[60]

46. Horaantii bishii Oktoobar 2016, FIEIT waxay siisay kaadhadhka aqoonsiga ilaa 102 suxufi oo ka shaqeeya warbaahinta madaxa banaan si loo baahiyo doorashooyinka, ka dib baadhitaanka ammaanka iyo saxeexa xeerka warbaahinta ee dhaqdhaqaaqa doorashada. Intaa waxaa dheer, saddex shaqaale oo ka tirsan Ururka Qaran ee Suxufiyiinta Soomaaliyeed (NUSOJ) ayaa waxa aqoonsaday FIEIT inay kanoqdaan goobjoogayaal Jowhar, Adaado iyo Baydhabo. Inkastoo saxafiyiinta iyo warbaahinada sheegeen inay guud ahaan ku naaloodeen xorriyad xaga la xidhiidhida musharixiinta iyo goobaha cod bixinta, haddana ilo xogogaal ahi waxay sheegeen in SIEITs ay saxaafadda cadaadis ku saareen warbixintooda, iyo in khilaaf ka dhex dhacay SIEITs iyo shaqsiyaad suxufiyiin ah.

47. Xoriyadda dhaqdhaqaaqa ee saxafiyiinta ayaa la xadiday bilowgii geedi socodka doorashooyinka. 21kii Sebtembar 2016, Maareeyaha Guud ee Ammaanka Madaarka Caalamiga ah ee Muqdisho (MIA) ayaa soo saaray amar ka mamnuucaya dhammaan suxufiyiinta ka shaqeeya dhammaan warbaahinada – kuwa dowlada leedahay iyo kuwa gaarka loo leeyahay - inay ka soo galaan Madaarka Caalamiga ah ee Muqdishu muddo 60 maalmood

[60]Afgooye FM radio ee magalada Afgooye, Bayaan FM Radio ee Beled-Xawo, Galgaduud FM radio ee Guriceel, iyo Radio Shabelle ee Mogadishu. Jariiradu waa Xog-ogaal uu kazoo baxda Muqdisho.

ah laga bilaabo 21ka Sebtembar, haddii aanay ka helin oggolaansho maamulka madaarka. Inkastoo Maareeyaha Guud ee Amniga Muqdisho uu ku sababeeyay xayiraadaha arrimo amni, qaar ka mid ah kormeerayaashu waxay kusoo gabgabeyeen in mamnuucidda loogu talagalay inay xakameyso saxafiyiintu baahiyaan musharixiinta tartanka ku jira, oo uu kamid yahy madaxweynihii hore ee Dawladda Federaalka Ku-meel-gaarka ah iyo kuwa kale oo ka imanayay dibadda si ay uga qaybqaataan doorashooyinka[61]. Amarka ayaa la qaaday 22kii September 2016, ka dib markii uu ka soo dhex galay Ra'iisal Wasaaraha dawlada federaalka Somaaliya.

48. Markii geedi socodka doorashada xubnaha Baarlamaanka Federaalka la soo gabagaboobey 14kii Disember 2017, Wasaaradda Warfaafinta iyo Xoghaynta Baarlamaanka Federaalka ayaa ku war galiyay suxufiyiinta iyo warbaahinta in kaadhadhkii Aqoonsiga ee ay soo saartay FIEIT aysan mar dambe shaqayneyn, una baahnaan doonaaan aqoonsi cusub si ay u baahiyaan xafladda furitaanka Aqalka Hoose iyo doorashooyinka Guddoomiyaha baarlamaanka iyo Madaxweynaha.

49. 27kii Disember 2017 (maalinka la furayay Baarlamaanka Federaalka), Wasaaradda Warfaafinta iyo Xoghaynta Baarlamaanka Federaalku waxay u oggolaadeen 35 suxufi goobta - 23 ka mid ah saxaafadda madaxabanaan iyo 12 ka mid ah warbaahinta dalka – iyagoo ku andacoonaya arrimo amni. Waxaa intaa dheer, kaliya Telefishanka Qaranka Soomaaliyeed (SNTV) ayaa loo oggolaaday in uu baahiyo munaasibada. Suxufiyiinta Madaxa-bannaan waxay ka walaacsanayeen dhexdhexaadnimada warbaahinta dawlada iyo faallooyinka ay bixinayeen saxafiyiinta ka shaqeeya warbaahinta dalka. Intii lagu guda jiray doorashooyinka Aqalka Sare, 11kii iyo 12kii Janaayo 2017, tirada saxafiyiinta ka socda warbaahinta madaxa bannaan ee loo oggolaaday gelitaanka ayaa la kordhiyay illaa 70. SNTV wuxu sii waday inuu keligii heysto baahinta dhacdooyinka doorashada, inkastoo Doorashadii Guddoomiyeyaasha iyo Madaxweynaha ay saxafiyiinta madaxa-bannaan ku qiimeeyeen inay ahaayeen kuwo hufan. Saxafiyiinta madaxabannaan waxay sidoo kale u arkeen in baahinta tooska ah ee munaasibadu ahayd mid dhexdhexaad ah.

**Xuquuqda Xoriyadda isku Imaanshaha Nabadda ah iyo Urur Sameynta**

50. Iyadoo ay jirto xaalad aan wanaagsaneyn oo nabadgelyo Al-Shabaabna ay sii wadeen weereradii, shakhsiyaadku awood umay yeelan inay si nabad ah u isticmaalaan xuquuqdooda isku imaansho iyo urureedba intii lagu gudo jiray doorashooyinka.

51. Intaa waxaa dheer, amarro xaddidaya kulamada siyaasadeed ayaa waxaa soo saaray hay'adaha dawladda federaalka ah iyo kuwa maamul goboleedyada ee Muqdisho iyo Beledweyne, iyagoo

[61] Eeg faallada guud ee Guddiga Xuquuqda Aadanaha, No 34, aayada. 37. Fallooyinka ayaa sheegaya in xakameynta tirada iyo nooca qoraalka ah ee laga yaabo in la qaybiyo xilliga ololayaasha doorashooyinka, xannibaadda helitaanka illaha wakhtiyada doorashooyinka , oo ay ku jiraan warbaahinta maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah, faallooyinka siyaasadeed, iyo xaddididda helitaanka xisbiyada mucaaradka iyo siyaasiyiinta warbaahinta waa dhibaato. Si kastaba ha ahaatee, faallooyinka guud ayaa tilmaamaya in ay noqon karto mid sharci ah oo ku wajahan xadidaada qaybaha qaar si loo xakameeyo doorasho hordhaca isla markiiba ka hor doorashada si loo ilaaliyo daacadnimada geeddi-socodka doorashada.

xusaya xaaladda ammaanka. 9kii Luulyo 2016, Wasaaradda Amniga Gudaha ayaa amar ku siisay hoteelada magaalada Muqdisho inaysan martigelinin kulan kasta oo aan lahayn ogeysiis hore iyo ogolaansho ka socota Wasaaradda Amniga Gudaha. Amarkan ayaa la soo saaray waqtigii dhaqdhaqaaq siyaasadeed oo xooggan uu magaalada ka socday, iyada oo qabaa'ilka iyo qabaa'ilada hoose ay qaybsanayeen kulamo si ay uga hadlaan jagooyinka iyo isbaheysiga siyaasadeed. Laga soo bilaabo 29kii Juun ilaa 15kii Luulyo 2016, saddex kulan oo heer sare ah iyo munaasibado siyaasadeed ayaa ka dhacay magaalada Muqdisho, kuwaas oo ay ka mid yihiin oday-dhaqameedyo caan ah oo loo yaqaanay in ay ka soo horjeedaan Madaxweynaha Federaalka Soomaliya. 15kii Agoosto, guddoomiyaha gobolka Hiiraan ayaa xayiraadyo lamid ah ku soo rogay hoteelada magaalada Beledweyne ee gobolka Hiiraan, taas oo ay ka taliyaan hoggaamiyeyaasha qabaa'ilka iyo siyaasiyiinta si adag uga soo horjeeda madaxweynaha FGS. 18kii Sebtembar 2016, Maamulka Gobolka Banaadir ayaa sidoo kale mamnuucay mudaharaadyada iyo dibad-baxyada siyaasadeed iyada oo aan fasax laga haysan. Afhayeenka Maamulka Gobolka Banaadir ayaa warbaahinta u sheegay in mudaaharaadyada xubnaha xisbiyada mucaaradka aan loo oggolaan doonin Muqdisho oo hadii aain ay u hoggaansamin go'aanka maamulka ay keeni karaan tallaabo sharci ah oo ka dhan ah kuwa ku xadgudbay amarka.

52. Saddex dhacdooyin ayaa muujinaya caqabadaha ay odayaasha, siyaasiyiinta iyo qabaa'illada ay wajaheen si ay u ololeeyaan doorashooyinka si xor ah. 29kii Juun 2016, xubno ka tirsan qabiilka Xawadle ayaa warqad u diray beesha caalamka oo ku eedeeyay dawlada federaalka Soomaaliya inay kuxadgudbeen xorriyadda hadalka. Waxay sidoo kale ku eedeeyeen Madaxwaynaha Soomaaliya in uu faragelin ku sameeyay arrimaha qabaa'ilka iyaga oo ay ka mid yihiin afar oday oo ka tirsan beesha Hawadle oo lagu daray liiska odayaasha la ansixiyay kuwaas oo aanay dooran beeshu inay matalaan iyaga. Tani waxaa lagu soo waramay in ay ka horjoogsatay beesha Xawadle in ay doortaan wakiiladooda. 28kii Juun 2016, Wasiirka Amniga Gudaha ee dawlada federaalka Soomaaliya (oo ka tirsan qabiilka Xawadle) ayaa soo saaray amar looga hortagayo xubnaha beesha Hawadle inay isku imaadaan si ay uga tashadaan mawqifkooda ku saabsan liiska dhawaan la ansixiyay ee 135 oday dhaqameed oo hogaamin lahaa geedi-socodka xulashada Baarlamaanka Federaalka.

53. 14 iyo 15 Luulyo 2016, saraakiisha Sirdoonka iyo Nabadgelyada Qaranka waxay kala kala diray laba shirar siyaasadeed oo lagu qabanqaabinayay hoteelada Muqdisho[62]. 14kii Luulyo, shir wada-xaajood ah ayaa waxaa Hotelka Maka Al Mukarama kusoo qabanqaabiyay odayaasha beelaha Hawiye. Hay'adda Nabad Sugidda NISA ayaa joojisay shirka sababo la xidhiidha hanjabaad dhinaca amniga ah oo ku wajahan odayasha, iyaga oo ku andacooday in ay qabteen gaadhi ay ka buuxaanwalxaha qarxay laguna bartilmaameedsanayay hoteelka. Mulkiilaha hoteelka ayaa warbaahinta maxaliga ah ku wargaliyay inuusan marnaba lala socodsiin hanjabaad ammaan oo ka dhan ah hoteelkiisa. Odayaashu ugu dambeyntii waxay

[62] Somalia: NISA Blocks Elders from Meeting in Mogadishu http://allafrica.com/stories/201607180273.html, last accessed on 28 March 2018.

kulan ku yeesheen guri gaar loo leeyay[63]. 15kii Luulyo, NISA waxay kala kicisay shir kale, oo ay abaabuleen Shiikhaal (jufo Hawiye ah) si looga wada xaajoodo magacaabista xubnaha Baarlamaanka Federaalka. NISA waxay sheegtay in qabanqaabiyeyaashu aysan haysan wax ogolaansho ah inay qabtaan kulan siyaasadeed.

**Xaqa Ka Qeybgalka Arrimaha Danta Guud**

54. Maaddaama xaaladda ammaanku aysan oggolaanin hirgelinta doorashooyinka guud, Soomaaliya waxaa lagu qasbay in ay ku dhaqaaqdo dheelitirka u dhexeeya xuquuqda muwaadiniinta si ay uga qaybqaataan arrimaha bulshada loo marayo mabda'a hal qof hal cod, iyo xuquuqdooda nolosha iyo badqabka jidheed. Inkastoo habka qabiilka 4.5 ay aqbaleen Soomaalida si ku meel gaadh ah oo awood qeybsi maadaama aanay jirin doorashooyin caam ah, waxay la micno tahay in xubnaha beelaha yar yar iyo beelaha laga tirada badan yahay aanay awood u lahayn inay si buuxda uga qayb qaataan geedi socodka go'aan qaadashada, taas oo aan waafaqsanayn heerarka caalamiga ah ee ku saabsan ilaalinta iyo kor uqaadida beelaha laga tirada badan yahay[64]. beelaha laga tirada badan yahay kuma lahayn wakiil Madasha Hogaanka Qaranka – guddiga muhiimka ee goaan ka gaaadhaya doorashada. Intaa waxaa dheer, heer goboleedka, ku dhowaad dhammaan go'aan-qaadayaasha muhiimka ah ayaa ka soo jeeda beelaha tirada badan.

*Haweeney Soomaali ah oo dooneysay in ay ku tartanto kursiga baarlamaanka federaaliga ah ayaa lagu qasbay inay iska dayso musharaxnimadeeda dhammaadkii Sebteembar 2016kii ka dib markii qaar kamid ah beesheedu ay ku cadaadiyeen in ay ka noqoto musharaxnimadeeda ugana tanaasusho musharax lab ah oo ka soo jeeda isla qabiilkeeda. Waxaa lagu qasbay in ay u guurto hudheel ka dib markii ay soo gaadheen hanjabaado iyo farriin qoraal ah oo ku amraya inay ka baxdo magaalada. Inkasta oo ay taageero ka heshay odayaal dhaqameedkeeda qaar, haddana way awoodi wayday inay olole samayso ayna raadsato taageero ku aadan musharaxnimadeeda iyada oo hanjabaadahaasi ay saameeysay xoriyaddeeda dhaqdhaqaaqa. Wareysiga ay UNSOM layeelatay Dhibanaha 2dii Oktoobar 2016.*

55. Madasha Hogaanka Qaranka ayaa aheyd gudigii ugu weynaa ee go'aan kagaadhida doorashooyinkii 2016-ka, iyo beelaha laga tirada badan yahay, haweenka, dhalinyarada, iyo dadka naafada ah oo aan lagu matalin hawshaas. Heer maamul gobolleed, ku dhawaad dhammaan go'aan gaadhayashii muhiimka ahaa ayaa ka soo jeeday qabiilooyinka waaweyn:

[63] Milkiilaha hoteelka ayaa warbaahinta Soomaaliyeed u sheegay inuusan ka warqabin weerarka noocaas oo kaliya oo laga maqlay warbaahinta. Waxa uu ugu yeeray dacaayad aan sal iyo raad lahayn oo lagu burburinayo ganacsigiisa. http://www.universaltvsomali.net/topics/news/somali/13352 (in Somali) last accessed on 27 March 2018.

[64] Baaqa ku Saabsan Xuquuqda Dadka ee Ku Xidhan Xeerka Qaran ama Qowmiyadeed, ee isla qaateen golaha qaramada midoobay Qodobka 47/135 ee 18kii Diseembar 1992 Qodobka 2, aayada 3 ayaa sheegaya in "dadka ka tirsan beelaha laga tirada badan yahay ay xaq u leeyihiin inay kaqeyb qaataan si waxtar leh go'aannada qaran iyo, hadday ku habboon tahay, heerka gobolka ee khuseeya dadka laga tirada badan yahay ee ay ka tirsan yihiin ama gobollada ay ku nool yihiin, qaab aan loo raaci karin sharciyada qaranka.

Hawiye Hiiraan iyo Galmudug; Daarood oo dagan Puntland iyo Jubbaland; iyo Raxanweyn (Digil iyo Mirifle) ee Koonfur Galbeed. Qaybinta kuraasta ee Aqalka Sare waxay muujineysaa awoodan. Ma jiraan kooxaha laga tirada badan yahay, oo ay ka mid yihiin Bulshada Banaadiriga iyo beelo badan oo yaryar, oo lagu soo doortay Aqalka Sare ee Galmudug, Koonfur Galbeed, iyo Puntland. Hal kursi oo keliya ayaa la siiyay bulshada jareerta ee Hirshabelle, halka gobolka Banaadir uusan wakiil ku lahayn Aqalka Sare.[65] Cabashooyinka ku saabsan ka-saarista waxay ka yimaadeen beelaha laga tirada badan yahay iyo qabiilooyinka yaryar, iyo sidoo kale qaar ka mid ah jufooyinka qabaa'ilka waaweyn ee gobollada kala duwan.

56. Shir jaraa'id oo Muqdisho ka dhacay 9kii Oktoobar 2016, xubno ka tirsan Reer Garaad ee Marehan ayaa si cad u cambaareeyay madaxweynaha Jubbaland isaga oo ka saaray liiska 20ka musharax ee loo soo gudbiyay doorashadii Aqalka Sare[66]. Odey ayaa sheegay in kursigooda la siiyey Reer Diini oo ah Mareexaan, kuwaas oo hore u helay saddex kursi ee Golaha Aqalka Hoose. Waxa uu sidoo kale cambaareeyay sanadaha badan ee qabiilkiisa lagu takoorayay iyo xaqiiqda ah in aysan ku jirin golaha fulinta ee xukuumada. Wuxuu intaa ku daray in shirkaa jaraa'id ee lagu qabtay magaalada Muqdisho ay tahay sababo la xidhiidha cabsi galin lagu sameeyay qabiilkiisa magalada Kismaayo.

57. Dibadbaxyo dhowr ah oo ay sameeyeen kooxaha haweenka iyo dhalinyarada ayaga oo dalbanaya in si wanaagsan looga qayb galiyo geedi socodka doorashooyinka ayaa ka dhacay Soomaaliya oo dhan 2016-kii. 6dii Agoosto 2016, kooxaha haweenku waxay qabteen banaanbax salmi ah oo ka dhacay bartamaha Muqdisho si ay u muujiyaan baahida loo qabo in la hubiyo ka qaybgalka haweenka ee arrimaha qaranka iyo in la fuliyo hirgelinta kootada 30% ee haweenka loogu talagalay Aqalka Hoose ee Baarlamaanka Federaalka ee ladhisi doono. Wakiilo sare ka socda maamulka gobolka Banaadir ayaa ka qeyb galay banaanbaxyadaas iyagoo jeediyay hadallo lagu taageerayay kootada 30%, kana dalbaday hoggaamiyeyaasha qaranka iyo odayaasha qabaa'ilku inay hirgeliyaan sidii lagu heshiiyey intii lagu jiray Madasha Hogaanka Qaranka oo Muqdisho lagu qabtay laga bilaabo 9kii ilaa 12kii Abriil 2016.[67] xilligii mudaharaadka lagusoo beegay uu ahaa mid muhiim ah, waayo xubnaha MHQ ayaa ku kulmayay Muqdisho.

58. Haweenku ugu dambeyntii waxay ka qaateen 66 kursi (24 boqolkiiba) Aqalka Hoose ee Baarlamaanka Federaalka, oo leh 275 xubnood. Tani waa korodh weyn marka loo eego 2012, marka ay matalayeen boqolkiiba 14. Hase yeeshee, hadafkii lagu heshiiyay ee boqolkiiba 30 lama gaadhin sababtoo ah qabiillada qaar ayaa ku fashilmay in ay u hoggaansamaan heshiiska faraayay in ay u qoondeeyaan tiro ku filan oo ah kuraasta haweenka oo kaliya ee Golaha Shacabka. Waxaa intaa dheer, tani waxay ahayd natiijada wada xaajood siyaasadeed oo ay

[65] Gobolka ugu dadka badan Soomaaliya, sida laga soo xigtay Sahanka Qiyaasta Dadweynaha ee UNFPA 2014, oo ka hadlaya 18 goobood oo ka mid ah dagaallada ka hor Soomaaliya: https://reliefweb.int/sites/reliefweb.int/files/resources/Population-Estimation-Survey- of Somalia-PESS-20132014.pdf markii ugu dambeysay ee la gaaro 29 December 2017.
[66] Beel katirsan Daarood oo kamida 4 ugu muhiimsan qaacidada 4.5 ee soomaliya
[67] Warbixinta Guddiga Hogaaminta Qaranka oo la soo saaray 12kii Abriil 2016.
https://unsom.unmissions.org/sites/default/files/final_communique_12_april_2016.pdf ugu dambaysay oo la helay 28 Maarso 2018. 70 Bayaan ay soo saartey Asha Gelle Dirie, Guddoomiye, Guddiga Safiirada Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ee Wakiilka Siyaasadda Haweenka ee Soomaaliya: Guulaha iyo Caqabadaha, 27 Janaayo 2017

haweenka Soomaaliyeedku guuuleysteen iyaga oo taageero ka helaya xubnaha ka tirsan beesha caalamka, oo ay ku jiraan Qaramada Midoobay iyo Midowga Yurub. Sida laga soo xigtay gabadh matasha haweenka Soomaaliyeed iyada oo la hadlaysay Golaha Ammaanka, maqnaanshaha sharci la dajiyay ayaa ahaa caqabadda ugu weyn ee hirgelinta go'aankaas siyaasadeed waana in xal laga gaadho ka hor doorashooyinka soo socda.

59. Ururada bulshada rayidka ah waxay ka cawdeen in qaar ka mid ah xubnahooda laga reebay wada-tashiyada asaasiga ah si ay u go'aamiyaan habka doorashooyinka iyo isu soo taagida doorashada. Wakiilada dadka naafada ah waxay sheegeen inay awoodi kari waayeen inay ka qeybqaataan wakiilo ahaan ama in ay kormeerayaal ka noqdaan ah inkastoo codsi gaar ah ay u dirsadeen FIEIT.[68] Waxay sheegteen in FIEIT ay u sheegtey in ergooyinka (51 xubnood oo ka mid ah Xubnaha Baarlamaanka) la soo xulay oo ay ku heshiiyeen beeluhu, iyo in aysan ku jirin meel ay ku doodaan in kuraas loo hayo dadka naafada ah ama u oggolaanaya kaalin goobjoogayaal. Ururada matala dadka naafada ah waxay ka qoomameynayaan in beesha caalamku aysan siinin isla taageerada la siiyay dumarka.[69] Dadka waddanka gudihiisa ku barakacay ayaa ah qayb weyn oo kale oo ka mid ah dadka Soomaaliyeed, oo si joogta ah uga cawda takoorida xaga nidaamka doorashooyinka oo ka dhashay nidaamka beelaysan.

60. Iyaga oo taageero ka heleya UNSOM, hay'adaha bulshada rayidka ah, waxay ku sameeysteen lix kooxood oo ay isku baheysteen ururada isku shaqada qabta,[70] waxay fuliyeen howlo wacyigelin ah oo Muqdisho ka socday intii u dhaxaysay July iyo October 2016-ka. Iyada oo diirada la saarayo arrimaha xuquuqda aadanaha iyo ka qaybgalka dadweynaha ee geeddi-socodka doorashooyinka, ururada bulshada rayidka ahi waxay qabteen olole wacyi-gelineed iyo olole xaga warbaahinta, gudi wada xajood ah, shirar, iyo tababbaro kusaabsan xuquuqda muwaadiniinta oo dhan si ay uga qaybqaataan geeddi-socodka doorashooyinka. Mashruucu wuxuu si gaar ah u bartilmaameedsanayay qaybaha dadweynaha ee la takooro, oo ay ku jiraan dhallinyarada, haweenka, dadka naafada ah, dadka gudaha ku barokacay iyo kuwa laga tirada badan yahay.

**Jawaab-celinta Garsoorka ee Xadgudubka iyo ku Xad-gudubka Xuquuqda Aadanaha ee Doorashada la xidhiidha**

61. Ma jiraan wax jawaab celina ah oo ku saabsan xadgudubyada xuquuqda aadanaha ee ku laxidhiidha doorashooyinka iyo xadgudubyada ay geysteen hey'adaha dowliga ah, kuwa aan dawliga ahayn iyo shakhsiyaadka gaarka ah. Ma jiraan wax baadhitaan ah oo la bilaabay mana jirto cid loo qabtay, marka laga reebo laba kiis. Nidaam la'aanta ay ku naaloonayaan kuwa loo heysto inay galeen xadgudubyada xuquuqda aadanaha iyo xad-gudubyada kale ayaa waxay si cad u jabinaysaa xuquuqda ku aaddan xallinta xadgudubyada xuquuqda aadanaha sida ku cad Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah ee Soomaaliya.

[68] Wareysi lala yeeshay dadka muhiimka ah, 30 November 2016
[69] Waraysi lala yeeshay dad muhiima 12 March 2017
[70] Dadka naafada ah, Haweenka iyo Carruurta, Warbaahinta, Dhalinyarada, Bani'aadamnimada iyo Horumarinta, Xuquuqda Madaniga iyo Siyaasadeed.Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah ee Soomaaliya, Qodobka 39aad: la tacaalida Xadgudubyada Xuquuqda Aadanaha.

62. Maqnaanshaha jawaab-celinta garsoorka ma ahan mid gaar u ah xadgudubyada xuquuqda aadanaha ee la xidhiidha doorashooyinka, hase yeeshee waxa ay ka turjumaysaa maqnaanshaha hayado cadaaladeed oo shaqeeya waddanka oo dhan. Madaxbanaani iyo dhexdhexaadno laanta, awoodo iyo kheyraad xadidan, awoodda darada sharci fulinta, iyo aragtida dadweynaha ee xiddidada u aasan ee musuqmaasuqa garsoorka ayaa gabi haan gacan ka gaysanaya maqnaanshaha nidaam cadaaladeed oo shaqeeya.

63. Maqnaanshaha xal cadaaladeed ee ku lug leh xadgudubyada xuquuqda aadanaha ee doorashooyinka waxaa lagu muujiyey xaqiiqda ah in 44 kiis oo ka mid ah dilalka odayaashii iyo ergooyinkii doorashada (15 lagu ka hor doorashada iyo 29 ka dib doorashooyinka), laba kiis kaliya ayaa xadhig iyo maxkamadayn la sameeyay. Waxaa intaa dheer, kiisaskan waxaa dhagaysatay Maxkamadda Militariga ah, taas oo ku xukuntay dil saddex eedaysane laba kalena oo xabsi daa'in. Marka laga soo tago su'aalaha ku saabsan in Maxkamadaha Milatarigu ay ku i habboon tahay fulinta xukunka dadka rayidka ah, Waxaa jira walaac laga qabo Maxkamadda Milatarigu oo ku saabsan tixgelin la'aanta nidaamka iyo heerka cadaalada ah.

**Baarista Arrimaha Xuquuqda Aadanaha ee Diiwaanka Ugu Jira Musharaxiinta Doorashooyinka**

64. Nidaamka doorashooyinka ee 2016-2017 kuma jirin shuruuda ah in lagu baaro diiwaanka xuquuqda aadanaha ee murashaxiinta, kuwaas oo dhalliyay walaac ku saabsan doorashooyinka shakhsiyaadka lagu soo eedeeyay xad-gudubyada xuquuqda aadanaha ama xadgudub halista ah ee sharciga biniaadnimo ee caalamiga ah. 16kii Oktoobar 2016, Qaramada Midoobay ee joogta Soomaaliya iyo xubnaha kale ee beesha caalamka,[71] oo ay ka mid yihiin Midowga Afrika iyo Midowga Yurub, ayaa soo saaray qoraal wadajir ah oo muujinaya dareenka kuwajahan murashaxiinta baarlamaanka ee leh taariikh dambi, rabshad iyo argagixisannimo, wuxayna ku booriyeen dadka wax dooranaya in aan la dooran shakhsiyaadka laga diiwaan galiyay dambiyada iyo rabshadaha si ay u metelaan qabiilkooda iyo qabiilada hoose Golaha Aqalka Hoose ee Baarlamaanka.[72]

65. Shakhsiyaadki musharaxnimadoodu walaac dhalisay waxa kamid aha dagaal oogayaal hore loo yaqaan iyo taliye sare oo millatari oo ka tirsanaa nidaamkii milatari ee Soomaaliya sannadkii 1980-kii, oo lagu eedeeyay in uu ku xadgudbay xuquuqda aadanaha iyo dembiyada dagaalna uu ka geystay magaalada Hargaysa.[73] Ku guuldaraysiga ah in la sameeyo kala-shaandhaynta shakhsiyaadka waxay gacan ka geysataa la xisaabtan la’aanta eedeysanayaasha, taas oo dhallisa jawi caddaalad darro iyo ciqaab la'aan. taasina waxaa ka dhashay in ugu yaraan afar dagaal-ooge oo hore loo yaqaan loo doortay labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka -

---

[71] Qaramada Midoobey, Midowga Afrika, Midowga Yurub, IGAD, Itoobiya, Talyaaniga, Sweden, Boqortooyada Ingiriiska iyo Maraykanka.

[72] https://unsom.unmissions.org/international-community-expresses-concern-over-parliamentary-candidates-history-violence-and last accessed on 4 April 2018.

[73] See U.S. and U.N. Policy https://www.hrw.org/reports/1994/WR94/Africa-08.htm#P356_163056 last accessed on April 2018

[78] Dastuurka kumeel gaadhka ee federaalka, Article 35: xuquuqda eedaysanayaasha

laba kasoo jeeda Galmudug, mid kasoo jeeda gobolka Hirshabelle, iyo mid kasoo jeeda Jubbaland, halka taliyihii hore ee militariga lagu jabiyay tartanka Puntland. 7dii Agoosto 2017, mid ka mid ah qabqablayaashii hore ee la soo doortay waxaa mar labaad loo doortay gudoomiyaha Guddiga Dib u eegista Dastuurka.

66. Inkastoo shakhsiyaadka la soo eedeeyay aan la dacweyn ama la xukumin, isla markaana, ay tahay inay u naaloodaan xaqa ah inay beri' yihhin ilaa maxkamad ku cadeyso dambi, doorashadooda Baarlamaanka Federaalka, sida uu qabo Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah, waxay siineysaa xaasaanad[74] iyo awoodo dheeraadka ah, taasoo ka hor istaageysa dhibbanayaashooda Xaqqa ay u lahaanyeen in ay helaan garsoor. Tani waxay dhalin kartaa in dadweynahu lumiyaan kalsoonida ay ku qabaan Baarlamaanka Federaalka - hay'ad korjoogteyn oo u xilsaaran geeedi socodyada muhiimka ah ee qaran, oo ay ka mid yihiin dib-u-eegidda Dastuurka iyo dib-u-heshiisiinta.

**Helidda Garnaqa/Xalka Xadgudubyada Doorashooyinka**

67. Maqnaanshaha xeerarka qaran ee doorashooyinka, iyo sida garsoorku u leeyahay kaalin aan qeexneyn oo wax looga qabanayo xad-gudubyada, Madasha Hogaanka Qaranka waxay ansixisay waajibaadka iyo awoodaha Guddiga Madaxabanaan ee Xallinta Khilaadka Doorashooyinka (IEDRM) bishii Sebteembar 2016kii.[75]

68. Guddiga Madaxabanaan ee Xallinta Khilaadka Doorashooyinka (IEDRM) waxaa loo aasaasay in uu ahaado gudi madax madaxbanaan oo shaqeeya mudo afar bilood ah, ilaa xubnihii la soo doortay ee Baarlamaanka la dhaariyey 27kii Disembar 2016. Waxaa loo xilsaaray in lagu xalliyo khilaafaadka iyo ismaan dhaafka ka soo baxa doorashooyinkii dadbanayd ee 2016-kii,[76] waxaana loo xilsaaray in uu wax ka qabto cabsi gelinta ergooyinka ama musharixiinta iyo in ay go'aan ka gaadhaan khilaafaadka natiijada. Waxay awood u laheyd in ay u yeeri kartay xubnaha FIEIT iyo SIEIT isla markaana codsan karayeen macluumaad dheeraad ah. IEDRM waxay ka koobnayd 25 xubnood, oo ay ku jiraan 4 haween ah - inkastoo shuruudaha tixraaca guddiga ay ku caddeyd in lagu daro ugu yaraan 6 haween ah.

69. Dhab ahaantii, Guddiga IEDRM ma uusan awoodin inuu si wax ku ool ah wax uga qabto dhammaan kiisaska loo soo jeediyay, awoodna umay lahayn inay codsadaan macluumaad dheeri ah oo ka socda FIEIT ama SIEITs, taas oo keentay welwel weyn oo ku saabsan doorkooda, awooddooda iyo madaxbannaanidooda. Waxaa intaa dheer, waxaa jiray eedaymo cabsi gelin, cadaadis siyaasadeed, iyo dhibaatayn ku wajahanayd xubnaha Guddiga madaxabanaan xalinta khilaafaadka doorashooyinka.

---

[74] Provisional Federal Constitution, Article 70: Xasaanada xubnaha golaha shacabka ee barlamaanka federaalka

[75] Warbixin ay soo saareen shirkii MHQ ee lagu qabtay Muqdisho intii u dhaxaysay 6 iyo 14 Sebtembar 2016. http://doorashada2016.so/wpcontent/uploads/2016/10/NLF-Communique-6-14-September-2016-English.pdf Last accessed on 28 March 2018

[76] Ibid

70. Sida laga soo xigtay shuruudaha tixraaca IEDRM, musharaxiinta oo la xaqiijiyay oo kaliya ayaa gudbin kara cabashooyinka ku saabsan xadgudubyada doorashooyinka, taaso ka reebaysa shakhsiyaadka kale ee munaasibka ah (sida kuwa la sheegay ina anay shurudaha buuxin ama laga joojiyay inay tartamaan ama si kalaba uga haray), ergooyinka, odeyaasha, iyo odayaasha beelaha hoose aan waxba haysan. Kalsoonidii lagu qabay Guddiga madaxabanaan xalinta khilaafaadka doorashooyinka waxay noqotay mid aad laysu weydiiyo markii qaar ka mid ah shakhsiyaadka iyo qabaa'ilada badan oo leh cabashooyin dhab ah oo ku saabsan natiijada geedi socodka doorashooyinka aan la dhagaysan, cabashooyinkoodiina la tuuray. 1,400ta cabashooyin ee ay heshay Guddiga madaxabanaan xalinta khilaafaadka doorashooyinka, 1,330 ayaa loo tixgeliyey in aan la aqbalin sababtoo ah inay awoodeedu xaddidan tahay. IEDRM ugu dambeyntii waxay diiwaan gashay 98 cabasho oo rasmi ah, inkasta oo qaar ka mid ah loo tixgeliyey in ay yihiin dembiyo ah oo ka dhacay meelo ka baxsan goobaha cod bixinta sidaas darteedna ka baxsan xayndaabka awoodeeda. IEDRM waxay ku talisay in la lalaalo 11 natiijooyin oo doorasho, Madasha Hogaanka Qarankana waxay xukuntay in 5 ka mid ah kuwan loo baahan yahay in dib loo soo loogu tartamo (gobol kastaba mid, oo uuy ku jiro kiis indhaha aad u soo jiitay oo ka dhacay Galmudug). Natiijooyinka lixda kiis ee kale ayaa sidoodi ahaaday xubnihii la soo doortayna waxay qaateen kuraastoodii baarlamaanka.

71. 10kii Janaayo 2017, siddeed musharax, oo ku lug lahaa 11 doorasho oo lagu muransana oo IEDRM ku talisay in la lalaalo, ayaa dacwad ka xareeyay Maxkamadda Sare si ay u u naqdiyaan go'aankii Madasha Hogaanka Qaranka ee ahaa in la baal maro talooyinka IEDRM. 16-kii Maajo 2017kii, Maxkamadda Sare ee Soomaalia waxay xukuntay in go’ankii Madasha Hogaanka Qaranka ay ku diideen talladii ahayd in la laalo 11 natiijo ee doorasha uu ahaa mid aan dastuuri ahay waxaanay ku amartay in dib loogu tartamo 8da kursi ee laga soo cawday.[77] Si kastaba ha ahaatee, 22kii Julaay 2017kii, Xubnaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka waxay xubnihii Golaha Wakiilladu ka horgeeyeen go'aanka Maxkamadda Sare iyagoo ku codeeyay (180/184) in aan labadalin, iyaga oo sheegay in geeddi-socodka doorashadu uu ku salaysanaa siyaasad loo dhan yahay laguna ansixiyay digreeto madaxweyne.[78]

72. Caqabadda kale waxay ahayd $ 1,000 oo aheyd lacagta qidmada oo loo baahan yahay si la diiwaangeliyo cabashada, taas oo xaddiday in dacwad la gaarsiiyo Guddiga Madaxabanaan ee Xallinta Khilaadka Doorashooyinka takoortayna iyadoo loo eegayo hantida. Musharixiinta aan haysan lacagtaasi waxay awoodi waayeen inay diiwaangeliyaan cabashooyinkooda manay haysan wax xal kale ah.

73. Mas'uuliyadda xilka Guddiga Madaxabanaan ee Xallinta Khilaadka Doorashooyinka waxay ku idlaatay caleemo saarkii baarlamaanka, 27kii Disembar 2016kii, iyada oo k atagtay dhammaan cabashooyinkii taagnaa oo aan la xalin. Inkasta oo aanay ahayn hay'ad baadhitaan oo buuxda, waajibaadkeeduna aad u xaddidnaa, Guddiga Madaxabanaan ee Xallinta Khilaadka

[77] Goaankii maxkamada sare: MS/D.t/09/2017 BG dated on 16 May 2017.
[78] https://www.Garooweonline.com/en/news/somalia/somalia-lawmakers-reject-supreme-court-ruling-on-nullified-seats last accessed 12 June 2017.

Doorashooyinka waxay ku fashilantay in ay siiso musharixiinta nidaamka xallinta khilaafaadka kaas oo keeni lahaa xisaabin iyo daahfurnaanta geedi socodka doorashooyinka waxayna kordhin lahayd kalsoonida guud ee geedi socodka. Guddiga Madaxabanaan ee Xallinta Khilaadka Doorashooyinka waxay cadeeyeen in aanay ahayn hab xisaabtan, oo aan ay helin inta badan dadka cabashooyinka qabay, kuna tiirsan saameyna kuleeyihiin jilayaasha siyaasadeed.

**V. Doorashada Madaxwaynaha Somaliland ee 13kii Nofembar 2017**

74. Somaliland waxay ku dhawaaqday inay xorriyaddeedii kala soo noqotay Soomaaliya 1991-kii, lakiin tan iyo markaas looma aqoonsan dowlad madaxbannaan - dawladda dhexe iyo beesha caalamka toona.

75. Laga soo bilaabo 2003, Somaliland waxa ay qabatay saddex doorasho madaxweyne oo caam ah. Inkasta oo ay calaamad u ahayd dib-u-dhacyo, doorashadu waxay keentay in si nabadgelyo ah loo la kala wareego awoodda. Somaliland waxay kunaalootay nabadgelyo, taas oo suurtogelisay in ay qabato doorasho hal qof iyo cal cod ah.

76. Dastuurka Somaliland iyo shuruucda kale waxay damaanad qaadayaan xuquuqda codbixinta iyo in laysu soo taagi karo xafiis, iyo sidoo kale xuquuqda xoriyada isu imaatinka iyo ururrada. Si kastaba ha ahaatee, Dastuurka ayaa xadiday tirada xisbiyada siyaasadeed ee Somaliland ilaa saddex muddo 10 sano ah.[79] Xaddidaadaan ayaa ka hor imanaysa xuquuqda aasaasiga ah ee xoriyadda isu imaadka ee ku xusan qodobka 22 (1) ee ICCPR iyo qodobka 10 (1) ee Axdiga Afrika ee Xuquuqda Aadanaha iyo Dadyowga, taasoo xaqiijinaysa in qof walbaa uu xaq u leeyahay inuu xor uyahay urur oo kujirto xaqa aad u leedahay inaad sameysid kana mid noqoto xisbi. Ka sokow, qofna uma istaagi karo doorashada isago ah musharax madax banaan. Xaddidaadkan ayaa ka hor imanaya xaqa loo leeyahay in lagu soo doorto ee qodobka 25 (b) ee ICCPR iyo qodobka 13 (1) ee Axdiga Afrika ee Xuquuqda Aadanaha iyo Dadyowga, tasoo xaqiijinaysa in muwaadin kasta uu xaq u leeyahay inuu si xor ah uga qayb qaato dawladda waddankiisa, si toos ah ama iyada oo loo marayo wakiilo si xor ah loo doortay.

77. Doorashada Somaliland ayaa markii hore la qorsheeyay bishii Juun 2015-kii, laakiin dib-u-dhac ku yimid khilaaf siyaasadeed, arrimo farsamo, iyo dhibaatooyin bani'aadamnimo ee ay keentay abaartu awgeed. Iyadoo Guddiga Doorashooyinka Qarank Somaliland (SNEC) uu markii hore qoondeeyay doorashadii 1-dii Juun 2016kii, bishii May 2015-kii, Golaha Guurtida (oo loo yaqaan Guurti) ayaa nasakhay goaankii SNEC si rasmi ahna u kordhiyay muddada Madaxweynaha iyo Baarlamaanka 22 bilood, ilaa 27kii Abriil 2017kii.[80]

78. Go'aanka Golaha Guurtida ee kordhinta Muddada Madaxweynenimo ee Somaliland waxay soo dhalisay mudaaharaadyo xisbiyada mucaaradkuna ka hor imaadeen go'aanka Golaha Guurtida Maxkamadda Sare dhexdeeda, oo ugu dambayntii ku raacday go’aanka Golaha Guurtida. Ka dib xukunkii Maxkamadda Sare, SNEC waxay dib u bilowday diyaar garow farsamo ee

[79] Qodobka 9 (2) ee dastuurka Somaaliland: Tirada xisbiyada siyaasadeed kama badan karo saddex (3). Sharciga Lambarka 14 (wax laga bedelay 2011) wuxuu xakameynayaa ururrada siyaasadeed iyo xisbiyada. Tartanka doorashada ee wadanka oo dhan ayaa loo abaabulaa xisbiyada siyaasadeed (cusub iyo da ') si ay u tartamaan 10-kii sano ee kasta. Sida ku xusan qodobka 6, xisbi siyaasadeed oo helay boqolkiiba 20 (codadka gobol kasta), waxaa loo aqoonsanayaa xisbi qaran. Xubnaha Golayaasha Deegaanka, Baarlamaanka iyo Musharaxiinta madaxweynenimada waxay ka iman karaan oo kaliya xisbiyada qaranka ee la aqoonsan yahay. Tartankii hore ayaa dhacay 2012-kii.

[80] Qodobka 83aad ee Dastuurka Somaliland (Habraaca Doorashadu) wuxuu Golaha Guurtidu u oggolaanayaa kordhinta muddada xilhaynta haddii aanay suurtagal ahayn in la qabto doorashada Madaxweynaha iyo Madaxweyne-ku-xigeenka sababo la xidhiidha tixgelinta amniga

doorashooyinka, diiwaangelinta codbixiyayaashuna waxay ka bilaabantay gobollada Somaliland intooda badan bishii Janaayo 2016kii. Si kastaba ha ahaatee, si degdeg ah ayaa loo joojiyey abaarta daran ee saameeysay badi Somaliland sababtayna barakac weyn awgeed. 6-dii Maarso 2017, Golaha Guurtidu waxay u codeeyeen in ay dib u dhigaan doorashadii madaxweynenimada ilaa November 2017kii. May jirin wax khilaaf siyaasadeed ah ama banaanbaxyo, xisbiyada mucaaradkuna waxay aqbaleen mudada cusub.

**Helitaanka Xalka Xadgudubyada Doorashooyinka**

79. Qodobka 66-aad ee Doorashooyinka madaxweynaha iyo Golayaasha Deegaanka ee Somaliland (Sharciga Lambarka 20/2001, ee la beddelay 2017) ayaa dejinaya habraacyada cabashooyinka la xidhiidha doorashada. Maxkamadda Sare waxay waxay goaan kagaadhaa sheegashooyinka la xidhiidha doorashooyinka Madaxweynaha iyo ku-xigeenkiisa cabashooyinkana waxaa looga baahan yahay in lagu soo gudbiyo Maxkamadda Sare toddoba cisho gudahood marka lagu dhawaaqo natiijada, ka dib marka ay Maxkamaddu kudhawaaqdo xukunkeeda muddo aan la cayimin.

80. 17kii Noofembar, laba maalmood ka dib maalintii doorashada, xisbiga mucaaradka ee Waddani ayaa ujaray xidhiidhka SNEC, isaga oo sheeganaya in SNEC aysan wax ka qabannin cabashooyinka ah in tiro badan oo goobo cod-bixineed ay si qaldan u tiriyeen codadka lana faro galiyay kaadhadhkii codeeynta. Si kastaba ha ahaatee, Waddani ma aysan keenin cabasho Maxkamadda Sare, sida la soo wariyay, sababto oo ah uma ay tixgelinayn Maxkamadda inay tahay mid dhexdhexaad ah. 17kii Nofembar, ka dib kullankii odayaasha dhaqanka, xisbiyada siyaasadda iyo madaxwaynaha xilka katagayay, Waddani wuxuu aqbalay natiijooyinka doorashada, sida lasoo sheegay nabada awgeed.

81. UNSOM HRPG waxay kormeertay xaalada xuquuqda aadanaha inta lagu guda jiray doorashooyinka waxayna si dhow ula shaqeynaysay dawladda hoose, bulshada rayidka ah, Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Somaliland, daneeyayaasha maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah ee ku sugan Somaliland oo dhan si ay u ururiyaan macluumaadka ku saabsan xadgudubyada xuquuqda aadanaha ee la xidhiidha doorashooyinka iyo xadgudubyada ka hor, inta lagu jiro iyo ka dib maalinta doorashada.

**Xaqa Ka-qaybgalka Arimaha Danta Guud**

82. Somaliland waxa ay hirgelisaa qaab sharci ah kaas oo guud ahaan damaanad qaadaya xaqa ah in laga qaybgalo arrimaha dadweynaha, iyo xaqa loo leeyahay in uu doorto loona doorto xafiisyada dawladda. Waxay guud ahaan u hoggaansamaan xeerarka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo heerarka sida mamnuucida takoorka iyo dhibaataynta. Waxay ku guuldareysatey inay siiso qodobbo gaar ah oo loogu talagalay haweenka, kooxaha laga tirada badan yahay iyo kooxaha dhallinyarada ah ee nugul markay u istaagayaan doorashooyinka xafiisyada dawladda.

83. Xubno ka tirsan ururada bulshada rayidka ah ayaa ka qaybqaatay geeddi-socodka doorashooyinka, waxaana ururka bulshada rayidka ee Somaliland aya kuguulaysatay inay shaqo galiso in ka badan 620 goob-joogayaal oo bulshada rayidka ah. Waxaa loo direy si ay u indho indheeyaan habka diiwaangelinta cod-bixiyeyaasha, waxaana loo oggolaaday inay soo galaan goobaha cod-bixinta maalintii doorashada. Lixdan kormeerayaal caalami ah oo SNEC casuuntay ayaa 3dii November loo kala diray Somaliland oo dhan, toban maalmood ka hor maalinti doorashada. Mid ka mid ah ururada maxalliga ah, difaacayaasha Xuquuqda Aadanaha ee Somaliland, ayaa sameeyay koox shaqaale ah oo ka kooban xubno tabaruc ah oo ka socda ururada maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah, si ay ula socdaan xuquuqda aadanaha inta lagu jiro doorashooyinka iyo inay is dhaafsadaan macluumaadka.

**Xuquuqda Nolosha iyo Nabad-qabka/sharafta Jidhka**

84. UNSOM HRPG waxay diiwaan-galisay 3 dhimasho iyo 17 dhaawac ah oo ay sababeen ciidamada ammaanka Somaliland muddadii ololaha iyo kadib dhammaadkii doorashadii 13-kii November 2017.

85. Dhimashada iyo dhaawacyada ayaa inta badan ku dhacay intii lagu jiray mudaharaadyadii, sababtoo ah i ciidamada bilaysku oo si fiican u tababarnayn oo aysan haysan qalab ku filan si loo xakameeyo dadka badan. Ciidamada Somaliland ayaa toogtay kuna dhaawacay siddeed mudaaharaadayaal degaanka Badhan ee gobolka Sanaag mudadii intii lagu jiray mudaharaad nabadgelyo ah 26-kii Oktoobar 2017. Badhan oo ku taal gobolka ay ku muransanyihiin dawlad-goboleedka Puntland iyo Somaliland, maamulka Puntland ayaa lagu soo waramay inay taageerayaan dibad-baxayaasha. Isla muddadaas, maamulka Puntland ayaa ciidamada ammaanka ka hawl galiyay xudduudaha gobolka Sool iyo gobolka Sanaag si ay uga hortagaan doorashooyin inay dhacaan.[81]

86. Muddadii sababtay natiijada doorashada, mid kasta oo ka mid ah labada xisbi ee ugu muhiimsan (Kulmiye iyo Waddani) ayaa kudhawaaqay in guuleysteen, taas oo horseeday

[81] Ciidamo kala duwan ayaa ka hawlgala gobollada lagu muransan yahay ee Sool iyo Sanaag, iyada oo meelaha qaarkoodna ay isbeddelaan iyagoo ku xidhan danaha siyaasadeed ee dadka deegaanka. Mas'uuliyiinta Puntland ayaa lagu dhiirrigeliyay in ay ka hor tagaan dadweynaha in ay ka qaybqaataan doorashada si ay u ilaaliyaan aaggaas.

suurto galnimada in isdaba marin dhaceen kuna boorisay taageerayaasha xisbiga mucaaradka ee Waddani si ay u abaabulaan banaanbaxyo ka dhacay degmooyinka qaarkood. 16kii Nofeembar 2017, taageerayaasha xisbiga mucaaradka ee ugu weyn (Waddani) ayaa ku mudaaharaaday magalooyinka Burco iyo Hargeysa, halkaas oo ay bilaysku isticmaaleen hub dilleena saddex qof oo rayid ah (laba dumar ah iyo hal dhallinyaro ah).

87. Xabadaha bilayska ayaa sidoo kale ku dhaawacay ugu yaraan sagaal qof oo rayid ah intii lagu guda jiray dibad-baxyadii doorashada, oo ay ka mid yihiin Hargeysa, Burco iyo Ceerigaabo. Masuuliyiinta Somaliland ma aysan sameynin baadhitaan si loo hubiyo in isticmaalka xoogga ahi uu yahay mid ku haboonaa khatarta ay wajahayeen ciidamada ammaanku. Warbaahinta ayaa soo warisay in maamulka Somaliland ay magdhow u u ballan qaadeen qoysaska laga dilay. Ma aysan qaban shakhsiyadka ammaanka oo masuul ka ah dhacdooyinka dhacay intii lagu jiray hawlgallada amniga ee caadiga ah laakiin waxay u qoondaysay lacag si ay magdhow u bixiso haddii ay dhacdo xaalad dhimasho ama dhaawac ah. Tani waxay gacan ka geysatey in aan ay sii jirto ciqaab la'aani. Isticmaalka awooda xad-dhaafka ah ee booliska waa dhacdo marwalba dhacda.

**Xuquuqda Xorriyadda Ururrada, Fikradda, Hadalka, iyo Saxaafadda**

88. UNSOM HRPG waxay diiwaangelisay xadgudubyo loo geystay xubno ka tirsan labada xisbi ee ugu muhiimsan (Kulmiye iyo Waddani), oo ay ku jirto dhibaateyn, xabsi, iyo xidhid iyada oon dacwad lagu soo oogin. Xubnaha Xisbiga talada haya ee ku biiray xisbiyada mucaaradka ayaa ku booriyay mas'uuliyiinta Somaliland in ay dhibaateeyaan ayna ku cabsi geliyaan, iyo in ay qabtaan oo ay xidhaan iyaga oo aan wax dambi ah lahayn.[82] Intii u dhaxaysey Juun iyo Sebtembar 2017, booliisku wuxu xidhay ugu yaraan 21 xubnood oo ka tirsan xisbiga mucaaradka ee Waddani iyo laba xubnood oo ka tirsan xisbiga mucaaridka ee Cadaalada Daryeelka ee deegaanada Burco, Hargeisa iyo Gebilley. Hal dhacdo oo Burco, gobolka Togdheer ka dhacday, bilaysku waxay xidheen 14 siyaasiyiin iyo taageerayaal ka soo jeeda Waddani intii u dhaxaysay 10kii iyo 15kii July 2017. Khabiirka Madax-bannaan ee Xaaladda Xuquuqda Aadanaha ee Soomaaliya ayaa warqad u diray Madaxweynaha Somaliland 29kii Sebtembar 2017, kuna dooday inay Mas'uuliyiinta Somaliland u hoggaansamaan Dastuurka ayna ka kana fogaadaan inay jabiyaan xoriyadda isu imaatinka.[83] Maalintii doorashada, bilaysku wuxu si kooban u xidhay Madaxa Shaqaalaha, maareeyaha ololaha, iyo la taliyaha arrimaha dibadda ee xisbiga mucaaradka ee Waddani. Intii lagu guda jiray dibad-baxyadii doorashooyinka ka dib, booliisku waxa ay bartilmaameedsanayeen xubnaha xisbiga Waddani waxayna ay xidheen in ka badan 25 xubnood intii u dhaxaysay 16kii iyo 19-kii Nofeembar

[82] Laga soo bilaabo dabayaaqadii 2016 ilaa bilowgii ololaha, dhowr siyaasiyiin iyo odeyaal qabiil ayaa ku soo biiray xisbiga mucaaradka ee WADDANI. Dhibaatooyinka waxaa lagu soo bandhigay bayaan saxaafadeed iyo xukuumadduna waxay ka jawaabtay cabsi gelin iyo xidhitaan.

[83] Qodobka 32aad ee Dastuurka Somaliland wuxuu ilaaliyaa xuquuqda xoriyada shirarka, ururrada iyo muujinta. Dastuurka Somaliland, Sharciga Saxaafadda, iyo xeerarka ku yaal Xeerka Aqlaaqda Saxaafadda ayaa bixiyay ilaalin ku saabsan faafreebka muddada doorashada. Si kastaba ha ahaatee, Wasiirka Warfaafinta Somaliland ayaa amar ku bixiyay in la xidho TV-ga Kalsan ee Hargeysa 4-tii November 2017, oo lagu soo warramay in uu ka warramay "war been ah" ka dib markii ay soo bandhigtay muuqaalo fiidiyoow ah oo bilays ah oo rasaas ah oo rasaas ah oo rasaas ah oo rasaas ah lagu furay si ay u kala diraan dad badan oo isku dayay in ay carqaladeeyaan madaxweynaha xisbiga talada haya ee Kulmiye ololaha, 3dii Nofembar ee Laas Caanood.

2017. Ugu dambeyntii waa la sii daayay iyada oo aan wax danbi ah lagu soo oogin, qaarna ka dib markii xisbiga Waddani uu aqbalay natiijooyinka doorashadii ogolaadayna guuldaradii 21 November 2017.

89. Somaaliland waxay leedahay afar telefishan oo gaar loo leeyahay iyo mid dowladeed, iyo sidoo kale hal idaacad oo dawladdu leedahay. Xoriyadda helitaanka macluumaadka ayaa la yareeyey muddadii doorashada, iyadoo la xidhay warbaahinada iyo lana xaddiday isticmaalka baraha bulshada. Tusaale ahaan, 12kii Luulyo 2017, Maxkamadda Gobolka Hargeisa waxay amartay shirkadaha internetka in ay ka hakiyaan internetka shan ka mid ah shabakadaha wararka: (1) Karinnews.com, (2) Saylactoday.com, (3) Haleelenews.com, (4) Baraarugnews .com, iyo (5) Suradnews.com. 2dii July, Waaxda Baadhista Dembiyada iyo Xafiiska Xeer-ilaalinta ee Hargeisa ayaa codsaday in la hakiyo shanta shabakadood, iyaga oo ku andacoonaya in ay faafinayaan wararka been-abuurka ah iyo dacaayad khatar gelinaysa amniga qaranka iyo wada noolanshaha nabaddeed ee beelaha Somaliland iyagoo muujinaya taageeradooda siyaasiyiinta qaarkood hoggaansamaya inta laga gaadhayo ololaha doorashada. Maamulayaasha iyo tifaftireyaasha shanta shabakadood laguma wargelin codsiga mana aysan joogin markii ay maxkamaddu soo saartay go'aanka. Bixiyayaasha internetku may hirgelin go'aanka maxkamada, websaydyaduna waxay sii wadeen shaqadoodi xitaa amarkaas oo aan la burin. Sidoo kale, 4dii Nofembar 2017, hal xaruun warbaahineed ayaa la hakiyay laba usbuuc bishii Nofeembar 2017, iyo galista baraha bulshada ayaa la xayiray afar maalmood ka dib maalintii doorashooyinka 13kii November. 23kii Nofeembar 2017, Maxkamadda Gobolka Hargeisa waxay amar ku siisay bixiyeyaasha internetka la xayiro Hadhwaangnews.com iyo Baligubadlelnews.com iyadoo ku saleyneysa daabacaadda warar been ah oo ku saabsan madaxweynaha la doortay.[84] Websaytka Hadhwaangnews.com ayaa markii dambe la furay, halka shabakada Baligubadlelnews.com ay sii xidhnayd ilaa June 2018.

90. 16kii Oktoobar 2017, EC, Wasaaradda Warfaafinta iyo Ururada saxafadu waxay saxiixeen Xeer Dhaqameedka Saxaafadda, kaas oo ku soo rogay waajibaad sharci ah oo ku saabsan warbaahinta, oo ay ku jiraan website-yo madax-bannaan iyo kuwa dawladdu maamusho, telefishanada iyo raadiyeyaasha, si ay dhexdhexaad uga ahaadaan siyaasada. Waxa kale oo ay ugu baaqday saddexda xisbi in ay si siman u isticmaalaan warbaahinta ay dawladdu leedahay inta lagu jiro ololaha. Guddi ka kooban wakiilo ka socda EC, Wasaaradda Warfaafinta iyo Ururada Warbaahinta ayaa la sameeyey si loo hubiyo in xeerka anshaxa la fuliyey iyo in la kormeero dhexdhexaadnimada warbaahinta inta lagu jiro ololaha iyo maalinta doorashada.

91. SNEC iyo Wasaaradda Warfaafinta ayaa isku raacay jadwalka baahinta ololaha ee warbaahinta dawladda (Radio Hargeisa, telefishanka qaranka, iyo wargeyska dawladda). Maamulayaasha warbaahinta dawlada ayaa taageeray Xeerka Anshaxa, laakiin waxay diideen

[84] Xeer Ilaaliyaha Guud ayaa soo bandhigay caddayn wuxuuna maxkamada ka codsaday in ay xayiraan bogagga internetka, oo ay maxkamaddu samaysay iyadoon wax dacwad ah samayn. Tallaabadani waxay ka hor imanaysaa Xeerka Habraaca Dambiyada iyo sidoo kale Dastuurka Somaliland, kaas oo u baahan in dhinacyada ay ku lug leh kiis keli ah inay joogan iyo in eedaysanaha la siiyo xuquuqda ay isku difaacaan.

in ay baahiyaan fikradaha xisbiyada mucaaradka kuwaasi oo khalkhal galinaya maaraynta arrimaha bulshada. Kormeerayaasha maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ah ayaa qiimeeyay in saddexda musharaxba ay si siman u heleen telefishanka qaranka iyo raadiyaha, iyo sidoo kale warbaahinta gaarka loo leeyahay intii lagu jiray ololaha. Tani waxay gacan ka gaysatay yareynta xiisadaha u dhaxeeya saddexda musharax, manay jirin wax cabashooyin ah oo ka yimid saddexda xisbi oo soo jeediyay in helitaanka warbaahinta dawladdu ay tahay mid cadaalad daro ah.

## VI. Gunaanad

92. Waxaa jiray guulo wax ku ool ah oo laga gaadhay hannaanka nabadda ee Soomaaliya shantii sano ee la soo dhaafay, inkastoo haweenka, kooxaha bulshada rayidka ah, dadka curyaamiinta ah iyo kuwa laga tirada badan yahay ay ka xadidnayeen nidaamka doorashooyinka ee 2016kii. Iyadoo xaaladaha aysan u oggolaanin doorashooyin guud, nidaam laanta sharciyeed oo loogu talagalay geedi socodka doorashooyinka "ku meel gaadhka ah" macnaheedu waxa weeye doorka hay'adaha muhiiimka ah aysan qeexnayn, iyo magacaabidda saraakiisha maamulayay doorashadu may ahayn mid daah furan. Amni-darrada, hay'adaha garsoorka ee daciifka ah, iyo nidaamka badbaadinta xuquuqda aadanaha ee aan ku filnayn ayaa gacan ka geystay xisaabtan la'aanta xadgudyada xuquuqda aadanaha ee Soomaaliya iyo Somaliland. Xadgudubka xuquuqda aadanaha waxaa ku kacay hay'adaha amniga iyo hay'adaha sirdoonka ee heer fadaraal iyo dowlad goboleed, iyo sidoo kale hay'adaha aan dowliga ahayn, oo ay ku jiraan Al-Shabaab. Inta badan qaybaha kala duwan ee xadgudubyada xuquuqda aadanaha ee la xidhiidha nidaamka doorashooyinka ayaan la baadhin, taasoo keentay sii socoshada xaalada isla xisaabtan la'aanta.

## VII. Talooyinka

**Ku Dowladda Federaalka Soomaaliya**

a. *In la qabto doorashooyin xor iyo xalaal ah oo ku saleysan shuruucda lagu xaqiijinayo hirgalinta xuquuqda codbixinta.*

b. *In la abuuro nidaam wakiilasho doorashooyinka mustaqbalka oo ay ku jiraan dhammaan muwaadiniinta, oo ay ku jiraan dadka gudaha ku barakacay, dadka curyaamiinta ah, beelaha laga tirada badan yahay, dhalinyarada iyo haweenka, iyadoo la isticmaalayo mabda'a hal qof, hal cod.*

c. *Xaqiijinta in si dhakhso ah oo madaxbanaan oo dhexdhexaad ah iyo baadhitaan buuxda loo sameeyo xadgudubyada xuquuqda aadanaha iyo xadgudubyada lagu geystey geedi socdkii doorashooyinka laga bilaabo 2016kii illaa 2018ka, iyo in ku geystay xadgudubyada lala xisaabtamo, lana damaanad qaado xaqqa ay dhibbanayaashu leeyihiin magdhow.*

d. *ilaalinta dhammaan xorriyadaha aasaasiga ah iyo xuquuqda ku qoran Dastuurka Soomaaliyeed iyo sharciga caalamiga ah, oo ay ku jiraan heshiisyada ay Soomaaliya qayb ka tahay, oo ay ku jiraan xuquuqda xorriyadda ra'yiga iyo hadalka, ururada iyo isku imaatinka nabadeed.*

e. *Xaqiijinta sharciyada qaranka ee doorashooyinka in la dajiyo kahor doorashooyinka 2020-2021 iyo in ay waafaqdo heerarka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, oo ay ka mid yihiin diiwaan gelinta diiwaannada xuquuqda aadanaha ee musharixiinta.*

f. *Xaqiijinta in mabaadii'da xuquuqda aadanaha, oo ay ku jirto takoor laantu iyo sinnaantu, lagu daro sharciga qaranka oo la fuliyo. Is badelada Dawladda iyo Xisbiyada Siyaasadu waa inay hubiyaan inay matalaan guud ahaan, ka-qayb-gallinta, iyo ka-qaybgalka firfircoon. Tani waa inay ka mid tahay samaynta qaab-dhismeed ilaaliya iyo habab xisaabtan ee doorashooyinka.*

g. *Horumarinta tallaabooyinka yareeyo khatarta rabshadaha doorashooyinka, oo ay ka mid yihiin tababbarka hay'adaha fulinta sharciga iyo ciidamada amniga lagu tababaro inta uu gaarsiisan yahay iyo xaddidaadda waajibaadkooda, gaar ahaan marka loo eego maaraynta saxda ah ee dibad-baxyada nabadgelyada ah.*

h. *Sameynta khadka telefoonka qarsoodiga ah ee bilaashka ah si loo soo sheego xad-gudubyada xuquuqda aadanaha ee la xidhiidha doorashooyinka, iyo habab lagu kalsoonan karo oo wax ku ool ah la dhiso, si loo baadho xadgudubyada xuquuqda aadanaha iyo*

*xadgudubyada la xidhiidha doorashooyinka iyo in ay qaadaan tallaabooyinka habboon ee wax lagaga qaban karo.*

i. *In la hubiyo ka qaybgalka haweenka iyo sidoo kale dadka ka tirsan qaybaha dadweynaha ee la takooray, oo ay ku jiraan dadka naafada ah doorashooyinka mustaqbalka iyo in la loo sharciyeeyo tallaabooyin gaar ah, oo ay ka mid yihiin kootooyin iyo tallaabooyin kale oo ku-meel-gaar ah oo laga saaro caqabadaha nidaamka, oo ay ku jiraan lacagta musharaxnimada iyo heerka waxbarashada. Ballanqaadyada kootada haweenka waa in la xaqiijiyo oo kor ay u qaadaan hoggaamiyayaasha Dowladda Federaalka iyo maamulada Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka, oo ay ka mid tahay cunaqabateyn ku aadan kuwa u hogaansami waaya.*

j. *Baadhitaan iyo dacwad lagu qaado weerarrada iyo falalka cabsigelinta ee muwaadiniinta, gaar ahaan haweenka markay ka qaybgalaan geeddi-socodka doorashada.*

k. *Xoojinta Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuquuqda Aadanaha si loo ilaaliyo loona hormariyo xuquuqda aadanaha, oo ay ka mid yihiin jilayaasha siyaasadda, suxufiyiinta iyo difaacayaasha xuquuqda aadanaha, iyada oo si gaar ah loogu fiirsanayo muddada doorashada. Guddiga Xuquuqda Aadanaha waa inuu si dhow ula shaqeeyaa NIEC, gaar ahaan kor u qaadida wacyi-gelinta xuquuqda aadanaha ee la xidhiidha doorashooyinka, sida ka qaybgalka siyaasadda iyo xorriyadda hadalka, ururada iyo isu imaatinka nabadeed.*

l. *In la tageero Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuquuqda Aadanaha si loo abuuro nidaam cabasho oo adag oo ku saabsan xadgudubyada xuquuqda aadanaha ee la xidhiidha doorashooyinka iyo xadgudubyada dhammaan qaybaha doorashada.*

m. *In la hubiyo in nidaamka xallinta khilaafaadka mustaqbalka ay ku saleysnaadaan qaab dhameystiran sharci ah; uuna hoostagaa masuuliyada Guddiga Qaranka ee Madax-bannaan ee Doorashooyinka; inuu awood u leeyahay inuu qaban karo cabashooyinka iyo inuu sameeyo baadhitaano; iyo in lagu dhiirigeliyo inay talooyin ku habboon siiyaan hay'adaha khuseeya.*

n. *Dejinta xeerka xoriyadda macluumaadka si loo oggolaado in dadweynahu ay helaan macluumaadka iyo xogta ay hayso Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo maamulada xubinta ka ah Dawladda Federaalka.*

o. *Dejinta sharciyo gaar ah oo ku saabsan ballaadhinta goobaha madaniga bulshada rayidka ah guud ahaan iyo ka qaybgalkooda geeddi-socodka doorashooyinka, gaar ahaan qayb ka mid ah la-talinta doorashooyinka ka hor iyo goobjoogayaasha, iyo ilaalinta difaacayaasha xuquuqda aadanaha sida ay ugu baaqday Qaraa 53/144 (1999) ee Golaha Guued ee Qaramada Midoobay oo ku saabsan Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda Shakhsiyaadka, Kooxaha iyo Ururada Bulshada si loo Horumariyo loona ilaaliyo Xuquuqda Aadanaha iyo Xoriyadda Asaasiga ah ee guud ahaan la aqoonsaday.*

p. *In la xoojiyo waxbarashada xuquuqda aadanaha ee bulshada rayidka ah iyo guud ahaan dadweynaha si loo hubiyo in jilayaasha muhiimka ah ay leeyihiin aqoon fiican oo ku saabsan sharciga doorashada iyo xuquuqdooda ku aaddan xoriyada hadalka, ururada iyo isu imaatinka nabadeed.*

**Ku Somaliland**

q. *Qabashada dib u eegis iyo falanqeyn ballaadhan oo ku saabsan hannaanka doorashooyinka madaxweynaha, gaar ahaan xadgudubyada xuquuqda aadanaha ee la xidhiidha doorashooyinka ee dhacay ka hor, intii lagu jiro iyo ka dib maalintii doorashada.*

r. *Dejinta sharciyo cusub oo hirgeliya qorsheyaal gaar ah si kor loogu qaado in ay fursad helaan haweenka, beelaha laga tirada badan yahay iyo kooxaha dhallinyarada si ay ugu istaagaan xafiis dawladeed, iyo in laga ilaaliyo takoorka.*

s. *In dib loo eego sharciyada ku muhiimka ah iyo dejinta sharciyo cusub si loo xoojiyo ilaalinta xuquuqda xorriyadda hadalka, oo ay ku jirto xoriyadda saxaafadda.*

t. *In la hubiyo in baadhitaanno madax-bannaan, lagu kalsoonaan karo oo dhexdhexaad ah in si dhakhso ah loo qabto dhammaan weerarrada iyo falalka handadaad jidheed, oo ay ka mid yihiin haweenka musharrixiinta ah, xisbiyada mucaaradka, suxufiyiinta iyo shaqaalaha warbaahinta ee dhacay intii lagu jiray doorashadii, iyo in kuwii geystay xadgudubyada lala xisaabtamo iyo waxay dhibanayaashu xaq u leeyihiin la dhameeystiro.*

**Ku Beesha Caalamka**

u. *In la siiyo caawimo dhaqaale iyo mid farsamo Guddiga Madaxbannaan ee Doorashooyinka Madaxabanaan ee Soomaaliya si loogu diyaariyo doorashooyinka 2020-2021.*

v. *In lagu sii dhiirri galiyo hoggaamiyeyaasha in ay hirgeliyaan mabda'a hal qof, hal cod ah iyo in la abuuro jawi loo dhan yahay oo dhamaan muwaadiniintu ay ku jiraan haweenka, dhalinyarada, dadka naafada ah, dadka gudaha ku barokacay, bulshada laga tirada badan yahay iyo kuwa kale si ay u awoodaan inay si ammaan ah iyo si xor ah uga qaybqaataan arrimaha dadweynaha, oo ay ku jiraan geedi socodka doorashooyinka.*